Waxbarashada Khaaska ah
… Adeeg, maaha meel.

Ogaysiiska waxbarashada Khaaska ah Hanaanka dhowridda Ardayda iyo Qoysaskooda

Baahiyaha hoosta Qaybta B Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah, iyo Shuruucda Gobolka Xukuma Waxabarashada Kaaska ah

Randy I. Dorn
State Superintendent of
Public Instruction

Dib u eegis lagu sameeyay Oktoobar 2013

Ogaysiiska Hanaanka dhowrida Waxbarashada Khaaska ah ee Ardayda iyo Qoysaskooda

Waxbarashada Khaaska ah
Xafiiska Korjoogaha Waxbarashada Guud
(Office of Superintendent of Public Instruction)
Dr. Douglas H. Gill
Maamulaha Waxbarashada Khaaska ah

Randy I. Dorn
Korjoogaha Waxbarashada Guud

Ken Kanikeberg
Madaxa Shaqaalaha

Gil Mendoza
Caawiyaha Korjoogaha
Barnaamijyada Khaaska ah iyo La xisaabtanka Federaaliga

Dib u eegid lagu sameeyay Oktoobar 2013

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

Wixii xog dheeraada ee ku saabsan
warqadahan xogta ah, fadlan wac:
Waxbarashada Khaaska ah, OSPI
Iimayl: speced@k12.wa.us
Telfoon: (360) 725-6075

Xogtan waxaa laga heli karaa:
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/Families/Rights.aspx

Xogtan waxaa lagu heli karaa codsi ahaan qaab kan ka bedelan adoo la xidhiidhaya:
Dugsiga Washington ee Indhooleyaasha Goobta galaan galka
http://www.wssb.wa.gov/Content/offcampus/bac.asp
(360)696-6321 x158

OSPI waxay ku bixisaa adeegsi loo simanyahay dhamaan adeegyada barnaamijyadeeda iyadoon lahayn takoor ku salaysan Sinji, isir, caqiido, diin, midab, asalka wadanka, da', askartii hore ee la fasaxay ama heer ciidan, nooca sinji oo uu ku jiro muujin sinji ama aqoonsi, jiritaanka wax dareemeed, maskaxeed ama naafanimo jidheed, ama adeegsiga ay hage ah oo tababaran ama qof naafo ah oo xaywaan u adeego. Su'aalaha cabashooyinka takoorka la tuhunsanyahay waa in lagu soo hagaajiyaa Maamulaha Eex la'aanta Iyo Xuquuqda madaniga ah (360) 725-6162 ama P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Xogta Guud 1

Hordhac 1

Yuu ku socdaa ogaysiisku 1

Wixii Xog Dheeraada ah 1

Ogaysiiska Hanaanka dhowrida 1

Ogaysiiska Hore ee Qoran 2

Afka Hooyo 3

Fariin Elektarooniya 3

Ogolaanshaha Waalidka--Qeexid 3

Ogolaanshaha Waalidka – Baahiyaha 4

Ogolaanshaha qiimaynta Hore 4

Sharciga khaaska ah ee hore ee xanaanaynta gobolka 4

Adeegyada Hore ee ogolaanshaha Waalidka iyo dib uga noqoshada ogolaanshaha adeegyada sii socda 5

Ogolaanshaha Waalika ee Dib u qiimaynta 6

Warqadaha xogaha ee Dedaalka Macquulka Lagu helayo Ogolaanshaha Waalidka 6

Xogta Kale ee Ogolaanshaha 6

Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan 7

Qeexid 7

Xuquuqda Waalidku U leeyahay Kharashka Dawaynaha 7

Qiimaynta ay Waalidku Bilaabeen 8

Qiimaynta ee Xaakinada Sharci Maamuleed 8

Heerka Qiyaasta Degmada 8

Xogta Qarsoodiga 8

Qeexitaano 8

Qof ahaan la Aqoonsan karo 9

Ogaysiis ku socda Waalidka 9

Xuquuqda Helitaanka 9

Helitaanka Diiwaanka 10

Diiwaanka in ka Badan Hal Ilmo 10

Qoraalka Noocyada iyo Goobaha Xogta 10

Kharashaadka 10

Dib U hagaajinta Diiwaanada Waalidka 10

Fursada Dacwada, Hanaanka dacwada iyo Natiijooyinka Dacwada 11

Ogolaanshaha Shaacinta Xogta Qof ahaan La aqoonsaday 11
Dhowrida Xogta Qof ahaan La Aqoonsaday 12
Burburinta, Haynta iyo kaydinta Xogta 12
Hanaanka Xalinta Khilaafka Waxbarashada Khaaska ah 12
Dhex dhexaadin 12
Guud 12
Eex la'aanta Dhex dhexaadiyaha 13
Heshiiska lagu Gaadhay Dhex dhexaadin 13
Faraqa u dhexeeya Waxbarashda Khaaska baadhitaanka Cabasho muwaadin iyo dacwada cadaali ah 13
Hanaanka Cabashada Muwaadinka 14
Cabasho Gudbinaya 14
Baadhitaanada Cabashada 15
Baadhitaan, Balaadhin, Go'aan Qoran 15
Bedelaadaha Cabashada 15
Waxbarashada Khaaska ah Cabashada Muwaadin iyo Dacwad Cadaalada oo Sharci ah 15
Hanaanka Dacwad Cadaalada oo Sharci ah 16
Guud 16
Soo Gudbinaya 16
Ogaysiika loo Baahanyahay ka Hor codsiga Dhegaysiga Dacwad cadaalada oo Sharci 17
Ku filaanta codsiga Dacwada 17
Bib U hagajinta Codsiga Dacwada 17
Jawaabta degmada ee Codisga Dacwad Cadaalada oo Sharci ah 17
Jawaabta Kooxda Kale ee Codsiga Dacwad Cadaalada oo Sharci 18
Qaabka Noocyada 18
Meelaynta Ardayga Marka Dacwad Cadaalad oo Sharci la Sugayo 18
Hanaanka Xalinta 19
Xalka Kulanka 19
Mudada Xalka 19
Ku hagaajinta 30 Maalmood ee Mudada Xalka 20
Heshiishka Dejinta oo Qoran 21
Mudada Dib U eegida Heshiiska 21
Codsiga Dacwada cadaalada Sharci oon Eex lahayn 21
Guud 21

Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ) 21
Xaalada Mowduuca ee Dacwad Cadaalada oo Sharci 22
Habka ay Isugu Xigto Codsashada Dacwad 22
Ka reebenayaalks Habka ay isugu xigto 22
Xuquuqda Dacwada 22
Guud 22
Xogta Shaacinta Dheeraadka ah 22
Dacwada Xuquuqda Waalidka 23
Habka Ay sigu Xigto Dacwad Habooni 23
Go'aanka Dacwada 23
Go'aanka ALJ 23
Qodobka Dhismaha 24
Codsi ka gaara Dacwad Cadaala oo Sharci 24
Helitaanada iyo Go'aanka ku socda Gudida la talinta iyo Dadwaynaha 24
Geba gebada Go'aanka; Rafcaan 24
Dacwadaha Madaniga ah, oo lagu Darayo Mudada La soo Gudbiyay Dacwadahas 24
Guud 24
Xadidida Wakhtiga 24
Hanaan Dheeraada 25
Sharciga Dhismaha 25
Kharashka Qaryaqaanka 25
Guud 25
Abaal marinta Kharashka 26
Hanaanka Edaabeed ee Ardayda Ku haboon Waxbarashada Khaaska ah 27
Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga 27
Go'aanka Kiis- Kiis 27
Guud 27
Masuuliyad Dheeraada 27
Adeegyada 28
Bedelka Meelaynta ay Sabab u tahay Ka saarid Edaabeed 28
Ogaysiin 29
Go'aanka Muuqaalka 29
Go'aanka in dhaqanku uu ahaa Muuqaalka Naafanimada Ardayga 29

Duruufo gaara 30
Qeexitaan 30
Go'aanka Meesha 30
Hanaanka Edaabta Dacwad Cadaalada oo Sharci 30
Masuuliyada Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ) 31
Meelaynta Inta Lagu Guda Jiro Dacwad Caadaalada oo Sharci 32
Ilaalinta AdeegyadaArdayda aan Weli ku haboonayn Waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha 32
Guud 32
Asaaska Aqoonta Xaaladaha Edaabeed 32
Ka reeban 32
Xaaladaha ku haboon Haddii aanay jirin Aasaas aqooneed 33
U gudbinta iyo Dacwada Masuuliyiinta Sharci Fulinta 33
Diiwaanka Gudbinta 33
Baahida Meelaynta Hal dhinac ah ee Waalidka Ardayda Dugsiyada gaarka ah Public ee Kharashka Dawaynaha 33
Magdhowga Meelaynta Dugsiga gaarka ah 34
Xadidida Mag dhowga 34
Ilaha 35

Xogta Guud

Hordhac

Shaksiyaadka Xeerka Waxbarashada naafada (IDEA) ee 2004, quseeya waxbarashada ardayda naafada ah waxay u baahanyihiin dugsiyadu in ay ku siiyaan, waalidka ardayga naafada ah, ama naafanimo looga shakisanyahay, ogaysiis ka kooban sharax buuxa oo ah xaquuqda helitaanka adeega hoosta xeerka IDEA iyo Waaxda Shuurcda Waxbarashada ee Maraykanka. Xafiiska Korjoogaha Waxbarashada Dadwaynaha (OSPI) waxa uu leeyahay sharciyo gobol oo xukumaysa bixinta waxbarashada khaaska ah. Sharciyadda waxaa laga helaa Cutubka 392-172A Xeerka Maamuleed ee Washington (WAC). Xogtani waxay u hogaansantahay Waaxda Waxbarashada Maraykanka Ogaysiiskeeda Hanaanka Nuqulka Dhowrida, ee dib loo eegay Juun 2009.

Yuu Ogaysiiskani ku socdaa

Ogaysiiskan waxa uu ku socdaa waalidka, waalidk ku simaha, iyo ardayga wayn. Tixraaca ah “adiga” iyo “ilmahaaga” siddoo kale waxaa loo adegsan karaa waalid ku simaha iyo ardayga wayn. Tixraacyada ogaysiiskan ee ku socda “dugsiga degmada” ama “degmada” waxa ku jira dugsiyada bulsho iskeed u samayso, iyo wakaaladaha kale ee dadwaynaha, sidda adeega waxbarashada ee degmooyinka iyo wakaaladaha waxbarashada ee adeega waxbarasho.

Wixii xog ah ee Dheeraada

Xog dheeraada oo ku saabsan adeegyada wax barashada khaaska ah ee habka dhowridda waxaa laga heli karaa adoo la xidhdiidhaya maamulaha waxbarashada khaaska ah ee dugsiga degmadaada, goobta tababarka waalidka iyo xogta ee gobolka Shuraakada Codka Falka ee Awood siinta (Washington Pave), ama adoo la soo xidhiidhaya OSPI. OSPI waxay leedahay bog internetka ah oo ka hadlaya waxbarashada khaaska ah: http://www.k12.wa.us/SpecialEd/default.aspx. OSPI waxay leedahay kormeerayaal iyo sarkaalka baadha cabashooyinka ee waxbarashada khaaska ah si uu kaaga caawiyo su’aalo ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Waxaad kala xidhiidh kartaa OSPI, Waxabrashada Khaaska nambarkan (360) 725-6075, TTY (360) 586-0126, ama speced@k12.wa.us.

Ogaysiiska Hanaanka Dhowrida
34 CFR § 300.504; WAC 392-172A-05015

Nuqul ogaysiiskani waa in lagu siiyaa (1) mar sanad dugsiyeed kasta, iyo: (2) gudbintaada hore ama codsigaaga qiimaynta; (3) markay degmadu hesho cabashadaada u horaysa ee mudawadinka waxbarashada khaaska ah gudaha sanad dugsiyeedka (4) markay degmadu hesho codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah ee waajibka ah sanad dugsiyeedka gudahiisa; (5) marka go’aan laga gaadho in la qaado talaabo edbin ah taas oo ka dhigan bedel ama meelayn; **iyo**, (6) ku salasyan codsigaaga.

Ogaysiiskan habka badbaadooyinka waxa ka midda sharaxaad buuxda oo ah dhamaan habka badbaadooyinka ee ilmahaaga ee la xidhiidha ku meelaynta ilmahaaga dugisga gaarka ah laguna bixinayo kharashka dadwaynaha, hanaanka cabshada ee muwaadinka waxbarashada khaaska ah, ogolaanshaha ku salaysan aqoon, hanaanka dhowrida ka koobnaa shuruucda Faraca E ee Qaybata B IDEA, Degmadu waxay dooraan kartaa in ay u isticmaasho ogaysiiskan ama ay ku kobciso ogaysiiska hanaanka dhowrida ku socda waalidka.

Ogaysiiska Hore ee Qoran
34 CFR §300.503; WAC 392-172A-05010

Dugsiga degmadaadu waa in uu ku siiyaa xogta qoran oo ku saabsan go'aamada muhiimka ah ee saameeya barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilamahaaga. Tan waxaa loogu yeedhaa ogaysiiska hore ee qoran waana xog qoran oo muujinaysa go'aanada lagu gaadhay kulanka ama degmada iyagoo kaga jawaabaya codsi aad samaysay. **Degmadu waxaa looga baahanyahay in ay kuu soo dirto adiga ogaysiiska hore ee qoran marka go'aanka la gaadho, laakiin ka hor intaan go'aanka la fulin.** Kuwani waa go'aano la xidhiidha talo bixinaha ama diidmooyinka in la bilaabo ama la bedelo cadaynta, qiimaynta, ama siinta ilmahaaga FAPE.

Ogaysiika qoran ee hore waa in ay ku jiraan

- Waxa degmadu ku talo bixinayso ama ay diidayso;
- Sharaxa sababata degamdu ugu talo bixinayso ama ku diidayso in ay taalabo qaado;
- Faahfaahin wixii doorashooyina ee ay ka fekereen kooxda IEP iyo sababaha loo diiday;
- Faahfaahinta hanaanka qiimayn kasta, qiimayn, diiwaan, ama warbixin loo isticmaalay siddii aasaaska talaabada;
- Faahfaahinta asbaabo kale oo la xidhiidha falka;
- Faahfaahin qiimanayn kasta oo hanaanka degmadu ku talo bixiyay in lagu fuliyo qiimaynta hore iyo wixii kasta ee dib u qiimayna;
- Warbxinta in waalidka lagu ilaaliyay hanaanka dhowrida lagu faahfaahiyay buug yaraha;
- Sidda aad ku heli karto nuqul ogaysiiskaan buug yaraha hanaanka dhowrida; ama ku dar nuqulka ogaysiiskan bug yaraha hanaanka dhowrida haddii aan mid lagu siin; **iyo**,
- Ilaha ama meelaha aad la xidhiidhayso si aad caawimo uga hesho fahanka hanaanada dhowrida ama ilaalinta.

Tusaalooyinka marka aad heli doonto ogaysiiska hore ee qoran waa:

- Degmadu waxay doonaysaa in ay qiimayso ama dib u qiimayso ilmahaaga, ama degmadu waxay diidaysaa in ay qiimayso ama dib u qiimayso ilmahaaga.
- Ilmahaaga IEP giisa ama meelaynta ayaa la bedelayaa.
- Waxaad waydiisatay bedel oo degmaduna waydiidaysaa in ay samayso bedelka.
- Waxaad siisay degmada ogaysiis qoran in aad dib ula noqonayso ogolaanshaha ilmahaagu in uu helo waxbarashada khaaska ah.

Ogaysiiska hore ee qoran waa inuu ku qoranyahay luqad ay fahmi karaan dad waynuhu oo lagugu siiyo afka hooyo ama hab kale oo la isku af garto oo aad isticmaasho, iyadoo aan si cad u ahayn suuragal in si fudud loo sameeyo. Haddii Afkaaga hooyo ama habka kale ee la isku af garto ee aad isticmaashaa aanu hayn luqad qoran, degmadu waa in ay qaado talaabooyinkan si ay u hubiso in: (1) ogaysiiska lagu turjumay af ahaan ama siyaabo kale oo luqadaada hooyo ah ama hab kale oo la isku af garto, (2) aad fahanto waxa uu ka koobanyahay ogaysiisku, iyo (3) uu jiro cadayn qoran in baahiyaha ka hooseeya (1) iyo (2) la buuxiyay.

Afka Hooyo
34 CFR §300.29; WAC 392-172A-01120

Afka hooyo, marka la isticmaalo iyadoo qusaysa qofka leh Xirfada luqada Ingiriisiga oo xadidan, macnaheedu waa:

1. Luqada uu qofkaasi isticmaalo caadi ahaan, ama, xaalada ilmaha, luqada caadi ahaan ay isticmaalaan waalidka ilmuhu.
2. Dhamaan xidhiidhka tooska ah ee ilmaha (oo ay ku jirto qiimaynta ilmahu) luqada uu caadi ahaan ilmuhu ku isticmaalo guriga ama deeganka uu wax ku barto.

Qofka dhegoolaha aha ma indhoolaha, ama qofka aan lahayn luqad qoran, habka la isku afgartaa waa waxa uu caadi ahaan qofku isticmaalo (habka dhegooluhu isku afgarto, habka indhooluhu wax u akhriyo, ama ku xidhiidhka afka).

Fariin Elektarooniya
34 CFR §300.505; WAC 392-172A-05020

Haddii ay degmadaadu siiso waalidka doorashada in ay xogta warqadaha ku helaan iimayl, waxaad dooran kartaa in aad ku hesho tan soo socota iimayl ahaan:

1. Ogaysiiska hore ee qoran;
2. Ogaysiiska habka badbaadooyinka; **iyo**
3. Ogaysiika la xidhiidha codsiga dhegaysiga talaabooyinka sharci ee waajibka.

Ogolaanshaha Waalidka – Qeexid
34 CFR §300.9; WAC 392-172A-01040

Ogolaansho micnaheedu waa:

1. Waxa si buuxda luguugu war geliyay afkaaga hooyo ama qaab kale oo la isku af garto (sidda qaabka dhegooluhu u hadlo, habka indhooluhu wax u akhriyo ama ku xidhiidhka afka) dhamaan xogta qusaysa talaabada aad ka bixinayso ogolaanshaha;
2. Waad fahantay oo waafaqday qoraalka talaabada, oo ogolaashahu waxa uu faah faahinayaa talaabooyinka iyo warbixinaha qoran (haddii ay jiraan wax) la baahin doono iyo cidda loo baahinayo: **iyo**,

3. Waxaad fahantay in ogolaanshahu aanu ahayn mid khasab ah dhankaaga waxaanad ka noqon kartaa (iska dhaafi kartaa) ogolaanshahaaga wakhtigaad doonto.

Haddii aad jeceshahay in aad ka noqoto ogolaanshaha ka dib marka ilmahaagu bilaabay helitaanka adeegyada waxbarashada khaaska ah, waa in aad taas ku sheegtaa qoraal. Ka noqoshadaada ogolaanshahu ka ma hor imanayo (ma burinayo) fal bilaabmay ka dib markaad aad bixisay ogolaanshahaaga iyo ka dib markaad ka noqotayba. Taa waxa raaca, degmada dugsiga loogama baahna in ay dib u hagaajin ku sameeyan (bedel) diiwaanka waxbarashada ee ilamahaaga si ay uga suuliyaan wixii ticraac ah ee helida adeegyada waxbarashada khaaska ah ee ilamahaaga.

Ogolaanshaha Waalidka – Baahiyaha
34 CFR §300.300; WAC 392-172A-03000

Ogolaanshaha qiimaynta ugu horayna

Degmadaadu ma fulin karto qiimaynta ugu horaynta ah ee ilmahaaga si ay go'aan uga gaadho xaq u lahaanshaha wax barashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ilaa ay ku siiso ogaysiiska hore ee qoran oo faahfaahinaaya waxqabadayada qiimaynta lagu talo bixiyay oo ay helaan ogolaanshahaaga, qoran ee aqoonta ku salaysan. Degmaadu waa in ay samaysaa dedaal macquula ah si ay u hesho ogolaanshahaaga aqoonta ku salaysan ee qiimaynta hore ah si ay go'aan uga gaadhaan haddii uu ilmahaagu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah.

Ogolaanshahaagu qiimayta ugu horayta ahi uma jeedo in aad siisay degmada ogolaanshahaagii si ay u bilaabaan siinta ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. Dugsiga degmadu siddoo kale waa in uu adiga kaa helaa ogolaansho in la siiyo ilamahaaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha marka ugu horaysa.

Hadii uu ilmahaagu ka diiwaangashan yahay dugsiga dadwaynaha ama aad raadinayso in aad ka diiwaangeliso dugsiga dadwaynaha oo aad diiday in aad bixiso ogolaanshaha qiimaynta ugu horaysa, degmadadaa **laga yaabaa**, laakiin loogama baahna in ay kuhesho ogolaanshahaaga iyadoo adeegsanaysa dhex dhexaadin ama habka dhegaysiga sharci waajibka ah, sidda ka dib lagu faahfaahiyay ogaysiiskan. Degmadaadu kuma xad gudbi doonto waajibaadkeeda inay hesho cadayso oo qiimayso ilmahaaga haddii ay doorato in aanay sii wadin qiimaynta ilmahaaga gudaha duruuftan.

Sharciga khaaska ah ee hore ee xanaanaynta gobolka

Haddii ilmahaagu yaalo meel ku meel gaadha oo lagu xanaaneeyo oo aanu kula noolayn adiga, dugsiga degmadu uma baahna ogolaanshahaaaga qiimaynta hore si ay go'aan uga gaadhaan haddii ilmahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah haddii:

1. Dedaal badan oo macquul ah in la sameeyo siddaa, degmadu kuma heli harto;

2. Xuquudaada waalidnimo waa la tirtiray iyadoo waafaqsan sharciga gobolka; **ama**
3. Xaakimku waxa uu go'aansaday xaq in uu gaadho go'aano waxbarasho qof aan adiga ahayni oo qofkaasna waxa uu bixiyay ogolaanshaha qiimaynta hore.

Xanaanaynta Ilmaha gobolka, ku jirta IDEA, waa ilmaha kaas oo ah:

1. Ilamaha xanaanda ku meel gaadhka ah oo aan loo gayn waalid koriya;
2. Looga fekeray xanaanaynta gobolka hoosta sharciga Gobolka Washington; **ama**,
3. Ama haynta Waaxda Adeegyada Bulshada iyo caafimaadka ama gobol kale wakaaladiisa daryeelka caruurta.

Halka gobolka ee caruurta lagu xanaaneeyo kuma jiro ilma la korinayo kaas oo leh waalid koriya.

Adeegyada Hore ee ogolaanshaha Waalidka iyo dib uga noqoshada ogolaanshaha adeegyada sii socd

Degmadaadu waa in ay samayso dedaad macquula si ay u hesho ogolaanshahaga qoran ee aqoonta ku salaysan oo waa in ay heshaa ogolaanshahaaga aqoonta ku salaysan ka hor intaanay siin ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya.

Haddaanad u jawaabin codsiga si aad ubixiso ogolaanshaha ilamahaagu in uu helo waxbarasho khaasa iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya, ama haddii aad diido in aad bixiso ogolaanshaha siddaas ah, degmadaadu laga yaabaa in ay adeegsato hanaan dhex dhexaadin ah si ay isugu daydo in ay hesho heshiis ama ay adeegsato dacwad cadaalada oo sharci ah si ay uga hesho xukun xaakimka maamulka sharciyeed si loo siiyo ilamahaaga wax barasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Haddii aad diido ama aanad ka jawaabin codsiga in aad bixiso ogolaanshahaaga ilmahaagu in uu helo waxbarashada khaaska ah ama adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya, dugsiga degmadu lagama yaabo in uu siiyo ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. Xaaladana, dugsiga degmadaadu:

1. Maaha xad gudubka waxa loo baahanyahay in la sameeyo waxbarashada dadwaynaha oo lacag la'aana kuna haboon (FAPE) ilmahaagu heli karo maxaayeelay guuldaradii in la siiyo adeegyadan ilamahaaga; **iyo**
2. Looma baahna in la yeesho kulan IEP ah ama loo kobciyo IEP ilamaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha awgeed kuwaas oo ogolaanshahooda la codsaday.

Markaas bixiso ogolaansho qoran ee ilamahaagu in uu helo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha, oo ay degmadu bilowdo in ay siiso adeegyada waxbarashada khaaska ah, ilmahaagu wuxuu ahaan doonaa mid xaq u leh in uu helo adeegyada wax barashada khaaska ah ilaa:

1. Isaga ama iyada dib loo qiimeeyo oo laga helo in aanay in dheeraada ku haboonayn heerka adeegyada waxbrashada khaaska ah;
2. Isaga ama iyadu uu ku qalan jebiyo dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah;
3. Isaga ama iyadu ay gaadho da'da 21 (ama haddii ilamahaagu 21 jirsado ka dib 31 Ogosto, isaga ama iyadu waxay xaq u yeelanaysaa adeegyada dhexda dhamaadka sanad dugsiyeedka); **ama**
4. Waxaad siisay degmada ka noqosho ogolaashahaagii oo qoran oo ah bixinta sii socota ee adeegyada waxbarashada khaaska ah.

Haddii aad dib uga noqoto ogolaanshahaagii adoo u qoraaya bixinta sii socota ee adeegyada ka dib markay degmadu bilowday adeegyada waxbarashada khaaska ah, degmadu waa in ay ku sii saa *ogaysiiska hore oo qoran* wakhti macquula ka hor intaanay joojin siinta ilmahaaga adeegyada waxbarashada khaaska ah. Ogaysiiska hore ee qorani waxaa ku jiri doona taariikhda ay degmadu joojin doonto siinta ilmahaaga adeegyada waxaanay kugu wargelin doontaa in dugsiga degmadu:

1. Maaha xad gudubka waxa loo baahanyahay in la sameeyo waxbarashada dadwaynaha oo lacag la'aana kuna haboon (FAPE) ilmahaagu heli karo maxaayeelay guuldaradii in la siiyo adeegyadan ilamahaaga; **iyo**
2. Looma baahna in la yeesho kulan IEP ah ama loo kobciyo IEP ilamaaga waxbarashada khaaska ah iyo iyo adeegyada la xidhiidha.

Degmadu ma adeegsan doonto dacwad cadaalada oo sharci ah si ay ugu tirtirto ka noqoshadaada qoran ama ay adeegsato hanaan dhex dhexaadin ah si ay u hesho heshiiskaaga si ay u sii wado siinta ilmahaaga adeegyada khaaska ah ee waxbarashada. Ka dib markay degmadu joojiso siin ilmahaaga adeegyada waxbarashada khaaska ah oo hoos imanaysa baahiyo la mida kuwaas oo ku haboon ardaydoo dhan. Adiga ama kuwa kale ayaa yaqaan ilamahaaga, oy ku jirto dugsiga degmada, waxa laga yaabaa in ay u gudbiyaan ilmaha qiimayn ugu horayn ah wakhti kasta ka dib markaas dib uga noqoto codsigaagii ahaa in ilmahaagu helo waxbarasho khaas ah.

Ogolaanshaha Waalika ee Dib u qiimaynta

Haddii baadhitaan cusub la fulinayo oo qayb ka ah dib u qiimaynta ilmahaaga, degmadaadu waa in ay heshaa ogolaanshaaga aqoonta ku salaysan ka hor inta aanay dib u qiimayn ilmahaaga, ilaa ay degmadaadu muujin karto in:

1. Ay qaaday talaabooyin macquula si ay u hesho ogolaanshaaga dib u qiimaynta ilamahaaga; **iyo**,
2. Maad ka soo jawaabin.

Haddii aad diido in aad ogolaato baadhitaan cusub oo qaybka ka ah dib u qiimaynta ilmahaaga, degmadu waxay kartaa, laakiin loogama baahna, in ay sii wado dib u qiimaynta ilmahaaga. Sidda qiimaynta u horaysana, degmadu kuma xad gudbayso waajibaadkeeda hoosta Qaybta B ee IDEA haddii ay diido sii wadista dib u qiimaynta iyadoo adeegsanaysa dhex dhexaadin ama dacwad cadaalada oo sharci ah.

Warqadaha xogaha ee Dedaalka Macquulka Lagu helayo Ogolaanshaha Waalidka

Dugsigaagu waa in uu hayaa cadaymaha macquulka ah si uu u helo ogolaanshaha qiimayntaada hore, si ay u bixiyaan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horaysa, si ay u fuliyaan dib u qiimayn taas oo ku lug leh baadhitaan cusub, goobta caruurta lagu xanaaneeyo ee dib ugu qiimanaynta hore. Cadaymahan waa in ay ku jiraan diiwaanka isku dayada degmada qaybahan, sidda:

1. Diiwaan faahfaahsan oo telefoonadii la diray ama la isku deyay iyo natiijooyijkii telfoonadaa la diray;
2. Warqado sawiran oo wada xidhiidhka laguu soo diray iyo wax jawaabo ah oo la helay; **iyo**
3. Diiwaan faahfaahsan oo ah booqashooyinkii lagu yimid gurigaaga ama shaqo iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Xogta Kale ee Ogolaanshaha

Looma baahna ogolaanshahaaga intaanay degmadaadu:

1. Dib u eegin xogta jirta oo qayb ka ah qiimaynta ilmahaaga ama dib u qiimaynta; **ama**
2. Siin ilmahaaga baadhitaan ama qiimayn kale oo la siiyo caruurtoo dhan, mooyaan ka hor baadhitaankaas ama qiimayntaas, ogolaanshahaa looga baahanyahay dhamaan waalidka caruurta.

Degmadaadu uma isticmaalayso diidmadaada in aad ogolaato hal adeeg ama wax qabad in ay kuu diido adiga ama ilmahaaga adeeg kale, dheef, ama wax qabad.

Haddii aad ilmahaaga ka diiwaan gelisay dugsi khaasa adoo kharashka ka bixinaya ama haddii aad ilmahaaga guriga wax ku barayso, oo aanad bixin ogolaanshahaaga qiimaynta hore ee ilamahaga ama dib u qiimaynta, ama aad ku guul daraysato in aad ka jawaabto codsi si aad u bixiso ogolaanshahaaga, degamada lagama yaabo in ay adeegsato hanaan dhex dhexaadin ah si ay u hesho ogolaanshahaaga ama ma adeegsan doonto dacwad cadaalada oo sharci ah si ay u tirtirto diidmadaada. Degmada loogama baahna in ay uga fekerto ilmahaaga siddii mid xaq u leh in uu helo adeegyada dugsiyada gaarka ah ee xaqa loo wada leeyahay, kuwaas oo ah adeegyo loo sahlay helida qaar ah ardayda dugsiyada gaarka ah waalidku-ku meeleeyay oo xaq u leh waxbarashada khaaska ah.

Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan
34 CFR §300.502; WAC 392-172A-05005

Waxaad xaq u leedahay helitaanka qiimaynta waxbarashada ee madaxa banana (IEE) ee ilmahaaga haddii aad khilaafto qiimaynta ay fuliyeen degmadaadu. Haddii aad codsato IEE, degmadu waa in ay ku siisaa xog ku saabsan meesha aad ka heli karto IEE iyo heerka qiimaynta ee degmada ee ku haboon IEE da.

Qeexitaano

- *Qiimaynta waxbarashada madaxa banaan* (IEE) macnaheedu waa qiimaynta uu fuliyay imtixaan qaade takhasus u u leh oo aan u shaqayn degmada ka masuulka ah waxbarashada ilmahaaga.
- *Kharashka dadwaynaha* macnaheedu waa in mid uun ay degmadu bixiso qiimaha buuxa ee qiimaynta ama ay hubiso in qiimaynta haddii kale lagugu siiyay bilaa qiimo.

Xuquuqda Waalidku U leeyahay IEE Kharashka Dadwaynaha

Waxaad xaq u leedahay IEE da ilamahaaga ee kharashka dad waynaha haddii aad khilaafto qiimaynta ilmahaaga ay degmadu fulinayso oo hoos imanaysa shuruudahan soo socda:

1. Haddii aad cosadato IIE ilmahaaga kharashka dad waynaha, dugsuga degmadaadu waa in 15 maalmoold gudahood oo codsigaaga ah, **mid uun** (a)soo gudbiyaa codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah uu u muujiyo in qiimayntoodii ilmahaagu ay haboontahay ama in qiimaynta ilmahaagu ee aad heshay aanay ku buuxinayn heerka qiyaasta degmadu u dejisay; **ama** (b) ku waafaqay in uu bixiyo kharashka dad waynaha ee IEE.
2. Haddii dugsiga degmadaadu uu codsado dacwad cadaalada oo sharci ah oo go'aanka kama dambaysta ahi uu yahay in qiimaynta degmada ee ilmahaagu ay haboontahay, weli waxaad xaq u leedahay IEE. Laakiin kuma helaysid kharashka dad waynaha.
3. Haddii aad ilamahaaga u codsato IEE, waxa uu dugsiga degmadaadu ku waydiin karaa sababta aad u diiday qiimaynta ay fulisay degmadu. Si kastaba ha ahaatee, degmadu uma baahan karto sharaxaad oo si aan macquul ahayna uma daahin karto mid uun bixinta IEE ee ilmahaaga ee kharashka dad waynaha ama gudbin codsi dacwad cadaalada oo sharci ah si ay u difaacdo qiimaynta degmada ee ilmahaaga.

Waxaad xaq u leedahay mid IEE da ah oo ilmahaaga kharaskh uun yahay ka dadwaynaha wakhti kasta oo ay degmadu fuliso qiimaynta ilmahaaga kaas oo aad ku khilaaftay.

Qiimaynta ay Waalidku Bilaabeen

Haddad hesho ku IEE da ilamahaga kharashka dadwaynaha ama aad siiso degmada IEE aad ku heshay kharash gaar ah:

1. Degmadaadu waa in ay kaga fekertaa natiijooyinka IEE go'aan kasta laga gaadho tixgelinta siinta FAPE ilamhaaga, haddii ay ku buuxiso heerka qiimaynta degmada ee IEE; **iyo**,
2. Adiga iyo degmadaadu waxay soo bandhigi kartaa IEE siddii cadayn markuu jiro hanaanka dhegaysiga waajibaadka sharci ee quseeya ilmahaaga.

Codsiyada Qiimaynta ee Xaakinada Sharci Maamuleed

Haddii ALJ codsato IEEda ilamahaaga oo qayb ka ah dacwad cadaalada oo sharci ah qiimaha qiimaynta waa in uu noqdaa kharashka dad waynaha.

Heerka Qiyaasta Degmada

Haddii kharashka IEEda lagu bixinayo karashka dadwaynaha, heerka lagu qiimeeyaa ee lagu helay qiimayntu, oo ay ku jirto goobta qiimaynta iyo takhasuuska imtixaan qaadaha, waa in ay la mid ahaataa heerka ay degmaduay isticmaasho marka ay bilaabayso marka ay bilowdo (ilaa xadka qiimaynahani ay ka waafaqsanyihiin xaqa aad u leedahay IEE).

Lag reebo sidda kor lagu faahfaahiyay, ku guma xidhayso shuruudo ama dhacdooyin isku xiga oo la xidhiidha ku helitaanka IEE kharashka dadwaynaha.

Xogta Qarsoodiga

IDEA waxay ku siinaysaa xuquuqda qusaysa diiwaanka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Xuquuqdani waa qaar lagu kordhiyay xuquuqda aad ku leedahay hoosta Xuquuda Waxbarashada Qoyska iyo xeerka Gaar ahaanshaha (FERPA) kaas oo ah sharci siiya dhamaan ardayda ilaalinta diiwaanka waxbarasho.

Qeexitaano
34 CFR §300.611; WAC 392-172A-05180

Sidda lagu isticmalay hoosta cinwaanka **Xogta Qarsoodiga**:

- *Burburinta* micnaheedu waxa weeye burburin muuqata ama ka saarida xogta waxyaabahii qofka lagu aqoonsan lahaa siddaas darted xogtu in dheeraada shakhsi ahaan lama aqoonsan karo.
- *Diiwaanka waxbarashada* micnaheedu waxa weeye nooca diiwaanka ku gedaaman hoosta qeexidda “diiwaanka waxbarashada” gudaha 34 CFR qaybta 99 (shuruucda fulinaya Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaar ahaanshaha Xeerka 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- *Wakaalada ka qayb galka* macnaheedu waxa weeye dugsi kastoo degmo, wakaalad ama hay’ad oo ururisa, haysa, ama isticmaasha xogta shakhsi ahaan lagu aqoonsado, kaas oo xogta laga helay, hoosta Qaybta B ama IDEA.

Shakhsi ahaan La aqoonsan karo
34 CFR §300.32; WAC 392-172A-01140

Shakhsi ahaan la qoonsan karo macnaheedu waa xogta leh:

1. Magaca ilmahaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca xubin kaloo qoyska ah;
2. Cinwaanka ilamahaaga;

3. Aqoonsi shakhsi sidda nambarka amniga bulshada ama nambarka ardayga; **ama**,
4. Calaamado qoran oo shakhsi oo lagu garto ama xog kale taas oo suura gelin lahayd in lagu aqoonsado ilmahaaga hubsiimo macquula.

Ogaysiis ku socda Waalidka
34 CFR §300.612; WAC 392-172A-05185

OSPI waxay bixinaysaa ogaysiis, iyadoo maraysa shuruucdeeda, si ay si buuxda kuugu wargeliso wax ku saabsan qarsoodiga xogta aqoonsiga shakhsi ahaaneed, oo ay ku jirto:

1. Faahfaahinta xadiga kaas oo lagu bixiyay ogaysiiska luqada hooyo ee kooxaha mujtamaca kala duwan ee gudaha Washington;
2. Faahfaahinta caruura xogta shakhsi ahaan lagu aqoonsado laga hayo, nooca xogta la la baadi goobay, qaababka Washington qorshaynayso in ay u adeegsato xog ururinta (iyadoo lagu darayo ilaha xogta laga soo ururiyay), iyo isticmaalka lagu samayn doono xogta;
3. Hanaanka iyo siyaasada kooban ee ay tahay in ay degmadu raacdo ku saabsan kaydinta, u muujinta koox sadexaad, dhowrida, iyo burburinta xogta shakhsi ahaan la aqoonsan karo; **iyo**,
4. Faah faahinta dhamaan xuquuqaha waalidka iyo ardayda ee quseeya xogtan, oo ay ku jirto xuquuqda hoos imnaysa Xuquuqda Qoyska iyo Xeerka gaar ahaanshaha (FERPA) iyo shuruucdeeda fulintu gudaha 34 qaybta 99.

Wax aqoonsi muhiima oo gobolkoo dhan, goob, ama qiimayn wax qabad (siddoo kale loo yaqaan “helid ilmo”) waa in ogaysiis lagu soo baahiyaa jaraa’idka ama ogaysiis laga bixiyaa saxaafada kale, leh dawin ku haboon si ay ugu wargeliso waalidka gobolkoo dhan wax qabadka lagu helayo goobta, aqoonsiga, iyo qiimaynta caruurta u baahan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Xuquuqda Helitaanka
34 CFR §300.613-617; WAC 392-172A-05190–05210

Waxaad xaq u leedahay in aad baadho oo dib u eegto diiwaanka waxbarashada ilamahaaga kuwaas oo la soo ururiyay, la hayay, ama uu isticmaalay dugsiga degmadaada ee hoos imanaysa Qaybta B ee IDEA. Degmadu waa in ay u hogaansantaa codsigaaga baadhida iyo dib u eegida diiwaan kastoo waxbarasho oo ilmahaaga ah iyadoo aanu jirin daahin aan lama huraan ahayn ka hor kulan kasta oo ku saabsan IEP, ama wax dacwad cadaalada oo sharci ah (oo ay ku jirto kulan go’aan qaadasho ah ama waxbarashada khaaska ah dacwad cadaalada oo sharci ah ee quseeya edaabta), oo sinaba aan ka badnayn 45 caano maal ka dib markaad samaysay codsiga.

Xaqa aad u leedahay in aad baadho oo dib u eegto diiwaanka waxbarashada waxa ku jira:

1. Xaqaaqa jawaabta ka imanaysa degmada ee ku saabsan codsiyadaada macquulka ee sharaxaada iyo turjumaada diiwaanada;
2. Xaqaaqa in aad codsato in dugsiga degmadu ku siiyo xaashiyo sawiran oo ah diiwaanka haddii aanad si saamayn leh u baadhi karin una samayn karayn dib u eegid adoo xaashiyahaa sawiran hela mooyee; **iyo**
3. Xaqaaqa in wakiilkaagu uu baadho dibna u eego diiwaanada.

Degmadu waxay u haysan doontaa in aad leedahay masuuliyada in aad baadho dibna u eegto diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga iyadoo lagu taliyo in aanad lahayn masuuliyad mooyee xaalado ku haboon sharci xukun xaaladaha sidda daryeelka, kala maqnaanshaha, iyo furritaanka.

Helitaanka Diiwaanka

Dugsi kastoo degmo waa in u hayaa diiwaanada kooxaha hela galaan galka diiwaanka waxbarashada la ururiyay, la hayay, ama la isticmaalay hoosta Qaybta B ee IDEA, iyadoo uu ku jira magaca koox, taariikhda galaan galka la bixiyay, iyo ujeedada taas oo kooxda loo ogolaaday in ay isticmaalaan diiwaanka. Dugsiyada degmooyinka looma baahna in ay hayan diiwaanka galaan galka ee waalidka ama shaqaalaha loo ogolyahay dugsiga degmada.

Diiwaanka in ka Badan Hal Ilmo

Haddii diiwaan waxbarasho uu ku jirto xog in ka badan hal arday, waxaad xaq u leedahay baadhitaan iyo dib u eegid xogta keliya ee la xidhiidha ilamahaaga ama in lagugu wargeliyo wax ku saabsan xogta haddii ay degmadu ku tusi kari waydo xogtaas iyadoo aan muujin xogta shakhsi ahaan lagu aqoonsado ee ku saabsan arday kale.

Qoraalka Noocyada iyo Goobaha Xogta

Haddii aad codsato, dugsiga degmadu waa in uu ku siiyaa qoraal noocyada iyo goobaha laga soo ururiyay diiwaanka waxbarashda, lahayay, ama ay isticmaaleen dugsiga degmadu.

Kharashaadka

Dussiga degmadu waxay ku waydiinaysaa kharashka nuqulada diiwaanka ee laguugu sameeyay hoosta Qaybta B ee IDEA haddii aanay kharashku si saamayn leh kaaga mamnuucayn xuquuqda aad ku samaynaso baadhitaanka. Kharash laguma waydiinayo in la baadho ama dib looga qaato xog hoosta IDEA.

Dib U hagaajinta Diiwaanada Waalidka
34 CFR §300.618 – §300.621; WAC 392-172A-05125

Haddii aad rumaysantahay in xogta diiwaanka waxbarasho ee ku saabsan ilmahaaga la ururiyay, la hayay ama lagu isticmaalay hoosta xeerka IDEA uu yahay mid aan sax ahayn, marin habaabis ah, ama ku xad gudbayo gaar ahaanshaha ama xuquuqda ilmahaaga, waxaad waydiisan kartaa degmada in ay bedelaan xogta.
Degmadu waa in ay go'aansataa haddii ay bedelayso xogta iyadoo waafaqsan codsigaaga mudo macquula gudaheed ee helitaanka codsiga.

Fursada Dacwada, Hanaanka dacwada iyoNatiijooyinka Dacwada

Haddii degmadaadu diido in ay bedesho xogta iyadoo waafaqsan codsigaaga waa in ay kugu wargeliyaan in go'aanka oo kugu waaniyaan xaqaaqa dhegaysi degmada ah.

Waxaad xaq u leedahay in aad codsato dacwad is aad uga doodo xogta ku jirta diiwaanka ilmahaaga si aad u hubiso in aanay khaldanayn, marin habaabis ahayn, ama haddii kale xadgudubka gaar ahaanshaha ama xuquuqda ilmahaaga. Dacwada in laga doodo xogta diiwaanka tacliinta waa in loo fuliyaa si waafaqsan hanaanka dhegaysiga degmada ee hoos imanaysa FERPA. Tani dacwad cadaalada oo sharci ah.

Haddii, sidda ay keentay natiijada dacwada, degmadu ay go'aansato in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabis ah ama haddii kale xadgudab gaar ahaansha ah ama xuquuqaha kale ee ardayga, waa in ay bedeshaa xogtaasi waafaqsan oo ay kugu wargelisaa adiga isbedeladan iyagoo qoran.

Haddii, sidda ay keentay natiijada dhegaysigu, degmadu ay go'aansato in xogtu aanay ahayn mid aan sax ahayn, marin habaabis ah ama haddii kale xadgudab gaar ahaansha ah ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waa in ay kugu wargelisaa in aad leedahay xaqa aad ku dhigan karto warbixin diiwaanka waxbarashada ilmahaaga oo ka faaloonaysa xogta ama bixinaysa sababaha aad ku khilaafsantahay go'aanka degmada.

Haddad go'aansato in aad warbixin dhigto diiwaanka ilamahaaga warbixintu waa in:

1. Haysaa degmadu siddii qayb diiwaanada ilamahaaga ah ilaa inta diiwaanka ama qaybta doodu ka taagantahay la hayo; **iyo**,
2. Haddii degmadu ay muujiso diiwaanka ilmahaaga ama qaybta doodu ka taagantahay koox kasta, warbixinta waa in loo muujiyaa kooxdaas.

Ogolaanshaha Shaacinta Xogta Qof ahaan La aqoonsaday
34 CFR §300.622; WAC 392-172A-05225

Ogolaanshahaaga qoran waa in la helaa ka hor xogta shakhsi ahaan la aqoonsaday loo shaacin kuwa kale ilaa shaacinta xogta aay ka koobantahay ee diiwaanka waxbarashada ilmahaaga loo ogolaado mooyaane ogolaansho la'aan waalid iyadoo

hoos imanaysa FERPA. Guud ahaana, ogolaanshahaaga looma baahna ka hor inta aan xogta shakhsi ahaan la aqoonsaday loo sii dayn saraakiisha wakaaladaha ka qayb gelaya siinaya ama bixinaya kharashka adeegyada ku meel gaadhka ah. Taa waxa raaca haddii ilmahaagu wax ka dhigto dugsi gaar ah, ogolaanshahaga waa in la helaa ka horta intaan wax xogta shakhsi ahaan la aqoonsaday loo siidayn saraakiisha degmada halka uu dugsiga gaarka ahi ku yaalo meesha uu ka degenyahay ilamahaagu haddii aanad qorshaynayn in aad ka diiwaan geliso ilmahaaga degmada aad degentahay.

Dhowrida Xogta Qof ahaan La Aqoonsaday
34 CFR §300.623; WAC 392-172A-05230

Dugsiga degmadaadu waa in ay ilaaliyaan sirta ahaanshaha xogta shakhsi ahaan la aqoonsaday ee ururinta, kaydinta, shaacinta, iyo xaaladaha burburinta. Mid ah sarkaal dugsiga degmadu qaadaa xilka hubinta qarsoodiga wax ah xogta shakhsi haan la aqoonsaday. Dhamaan dadka ururinaya ama adeegsanaya xogta shakhsi ahaan la aqoonsaday waa in ay helaan tababar ama ama tilmaamo quseeya qarsoodiga oo hoos imanaya Qaybta B ee IDEA iyo FERPA.

Dugsiga degma kastaa waa in uu u hayaa, baadhitaanka dadwayanaha qoraalka magacyada hadda iyo boosaska shaqaalahaa ku jira wakaalada kuwaas oo galaan gal u yeelan kara xogta shakhsiyeed ee la aqoonsaday.

Burburinta, Haynta iyo kaydinta Xogta
34 CFR §300.624; WAC 392-172A-05235

Dugsiga degmadadu waa in uu kugu wargeliyaa marka xogta shakhsiyada la aqoonsaday la ururiyay, la hayay, ama la isticmaalay in aan in dheeraada loo baahnayn in ay siiso adeeg waxbarasho ilmahaaga.

Markaan in dheeraada loo baahnayn, xogta waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, diiwaan ku meel gaadha oo ilmahaaga magaciisa, cinwaan, iyo telfoon nambar, darajadiisa fasal, diiwaanka soo xaadirka, xiisadaha uu soo xaadiray, heerka darajada uu dhamaysatay, iyo sanadka la dhameeyay waxaa laga yaabaa in la hayo xadidaad la'aan.

Sharciga gobolka ee ku saabsan haynta diiwaanka waxa uu ka koobanyahay Cutubka 40.14 RCW. Hanaanka ilaa inta ay leegtahay inta degmadu ay hayn karto diiwaanada waxa daabacaad ku baahiyay Xoghayaha Gobolka Washington, Qaybta Kayda Diiwaanada iyo Maamulka Diiwaanada.

Hanaanka Xalinta Khilaafka Waxbarashada Khaaska ah

Waxaad tahay ka qayb gale fiican dhamaan sifooyinka barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Ka qayb galkuna waxa uu ka bilaabmaa gudbinta hore ee ilamaaga. Adiga iyo degmadaadu waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay la wada shaqeeyaan si ay isgu dayaan xalinta khilaafaadka kaas oo saamaynaya barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Marka adiga iyo degmadaadu aanay awood u lahayn ay ku xaliyaan khilaafka, waxa jira ikhtiyaaro badan oo ah xalinta khilaafaadka rasmiga ah oo la heli karaa. Ikhtiyaaradan waa dhexdhexaadin, cabshooyinka muwaadinka, iyo dacwad cadaalada oo sharci ah.

Dhex dhexaadin
34 CFR § 300.506; WAC 392-172A-05060–05075

Guud

Adeegyada dhex dhexaadinta ayaad ku heli kartaa bilaa qiimo ama degmada ayaa caawinaysa xalinta dhibaatooyinka quseeya aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarasho, iyo siinta FAPE ilamhaagaoo marka dacwad cadaalada oo sharci ah la codsado. Waa mutadawacnimo loomana isticmaali karo in la diido ama la daahiyo xaqaaga dacwad cadaalada oo sharci ah ama in la diido wax xuquuqa oo kale oo la iska bixin karo hoosta Qaybta B ee IDEA. Kulanka dhexdhexaadintu waxa jadwal loogu sameeyay qaab wakhti ahaan ku haboon goob ku gu haboon adiga iyo degmada.

Dugsiga degmadu waxa uu horumarinayaa hanaan kaas oo siinaya waalidka aan dooran in ay adeegsanaan habka dhex dhexaadinta, fursad ay ku kulmaan, wakhtiga iyo goobta kugu haboon adiga, oo lala kulmaya kooxda aan danaynayn:

1. Kaas oo qandaraas u haysta qaab ku haboon oo loo bedelen karo xalinta khilaafaadka, ama tababrid waalid iyo goobta xogta ama goobta u hawl u adeega waalidka gudaha gobolka; **iyo**,
2. Yaa sharaxi lahaa dheefaha oo ku dhiiri gelin lahaa adiga adeegsiga hanaanka dhex dhexaadinta.

Eex la'aanta Dhex dhexaadiyaha

Dhex dhexaadin ta waxaa fuliya qof takhasus u leh, aan cid u eexan, oo loo tababaray farsamo dhex dhexaadin oo saamayn leh. Qofkaasi waa in uu aqoon fiican ka haystaa shuruucda iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. OSPI waxay qandaraas siisaa wakaalad dibada ah si ay u fuliso dhexdhexaadinta. Wakaaladaasi waxay haysaa magacyada dhex dhexaadiyayaasha. Dhex dhexaadiyayayasha waxaa lagu maga caabaa si aan nidaamsanayn, wareeg ah ama siyaabo kale oo aan eexasho ku jirin. Dhex dhexaadiyaha (1) lagama yaabo in uu noqdo shaqaale OSPI, degmo ama wakaalad kale oo dowlada ah taas oo siinaysa ilmaha adeegyo toos ah mawduuca u ah hanaanka dhex dhexaadinta, (2) oo lagama yaabo inay ka yeelato dan xirfadeed ama shakhsiyeed. Kulanada dhex dhexaadinta waxaa jadwal loogu sameeyay qaab wakhti ku haboon ah goob ku haboon adiga iyo degmada.

Heshiiska lagu Gaadhay Dhex dhexaadin

Haddii adiga iyo degmadu aad heshiish gaadhaan, waa in lagu dhigaa heshiiska dhex dhexaadinta oo qoran oo lagu saxeexay heshiis si sharciya isugu xidhaya. Gorfaynaha inta lagu jiro kulanka dhex dhexaadinta waa qarsoodi oo looma adeegsan karo cadaynahaan wax dacwad cadaalada oo sharci ah ama dacwad madani ah maxkamada kastoo Federaalia ah ama maxkamada Gobolka Washington.Tan waa in lagu sheegaa heshiiska qoran. Si kastaba ha ahaatee, heshiiska dhex dhexaadintu

laftiisu waxaa loo isticmaali karaa cadayn ahaan. Heshiiska dhex dhexaadinta si sharci yah ayay isugu xidhamayaan gudaha waxaana laga dhaqan gelinayaa maxkamad gobol oo kasta oo sharci fulin leh ama maxkamada degmada Maraykanka.

Wax barashda Khaaska baadhitaanka Cabasho muwaadin iyo dacwada cadaali ah

Qawaaniinta Qaybta B ee IDEA waxay leeyihiin hanaano kale duwan ee cabashooyinka gobolka (cabashada muwaadinka) iyo dacwad cadaalada oo sharci ah. Cabashada muwaadinka waa lala soo gudbinayaa OSPI waxaana usoo gudbinayaa urur ku tuhunsan in dugsiga degmadu, OSPI, ama wakaalad kastoo dadwayne ay ku xad gudubtay baahiyaha Qaybta B ee IDEA, xukunka federaaligu waxa uu ka koobnaa 34 CFR Qaybta 300, ama shuruucda gobolka fulinaya Qaybta B ee IDEA. Cabshooyinka muwaadinku waxaa baadhaya OSPI, iyadoo ku salaysan xad gudubyada uu bixiyay qofka cabshada soo gudbiyay, iyo dugsiga degmada, ama wakaalad kale oo ka jawaabaysa cabshada. Cabshada muwaadinku, iyo dugsiga degmadu waa in lagu soo gudbiyaa hal sano gudahood oo ah xad gudabka la tuhunsanyahay.

Dacwad cadaalada oo sharci ah siddoo kale waxaa soo gudbin kara adiga ama dugsiga degmada arin kastoo la xidhiidha aqooonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ee ilmahaaga, ama siinta waxbarashada dadwaynaha ee ku haboon oo lacag la'aana (FAPE) ilmahaaga. Dacwad cadaalada oo sharci ah waxaa fulinaya qaadiga maamulka sharci (ALJ), oo ay shaqaaleeyeen Xafiiksa Dhegaysiga Maamul, taas oo ah wakaalad gobol oo madax banaan. Dacwad cadaalada oo sharci ah guud ahaan waxa uu ku lug yeeshaa cadaynta markhaatiga iyo hordhaca cadaynta. Codisiyda dhegaysiga waajibaadka sharci waa in lagu soo gudbiyaa halsano gudaheed ee xad gudubka la tuhunsanyahay (iyagoo waxoogaa metelaad khalad iyo qarinta xogtu ay ka reebantahay)

Hanaanka iyo sidda uu qaabaysanyahay cabashada muwaadinka iyo dacwad cadaalada oo sharci ah waxaa lagu sharaxayaa xaga hoose.

Hanaanka Cabashada Muwaadinka
34 CFR §§300.151 – 300.153; WAC 392-172A-05025–05045

OSPI waxay leedahay nidaamyo lagu xalilaayo cabashooyinka gobolka. Hanaanadaasna waxay ka kooban yihiin xeerarka gobolka iyo xogta qusaysa cabshooyinka waxa lagu hayaa Bogga internetka.

Hadii adiga, qof kastaa, ama urur, aaminsan degma, OSPI, ama meel waxbarashoo jirta ay maamusho IDEA in ay ku xad gudubtay Qaybta Be IDEA, fulinta shuruucda Qaybta B, ama Sharciga gobolka ee lagu dabaqi karo, waxaad soo gudbin kartaa cabashada Xafiiska Kormeerka Waxbarashada Dadwaynaha (OSPI), Waxbarashada Khaaska ah, PO Box 47200, Olympia, WA 98504-7200. Waa in aad siisaa nuqulka cabashada degmada ama wakaaladaha kale ee aad ka cabanayso.

Cabasho Gudbinaya

Cabashada waa in aad saxeexdaa adigu ama qofka ama ururka cabshada ama ashkatada gudbinayaa waa in ta soo socotaana ay ku jirtaa:

- Warbixinta in degmada ama wakaalada kale ku xad gudubtay baahida Qaybta B ee IDEA, shuruucda fulinaysa Qaybta B, lagu dabaqi karo shuruurcda gobolka, ama warbixinta in degmadu ama wakaalad kale aanay fulinayn dhex dhexaadinta ama xalka heshiiska;
- Magaca iyo cinwaanka degmada ama wakaalada;
- Magaca ardayga, haddii cabashadu ay gaar u tahay ardayga, iyo xogta la xidhiidhka ee ardayga haddii uu ardaygu yahay bilaa hoy;
- Faahfaahinta dhibaatada leh xaqiiqooyin gaar ah;
- Xalka dhibaatada lagu talo bixiyay ilaa xadka xogta laga ogyahay ee aad heli karto wakhtiga aad gudbiso cabshada; **iyo**,
- Magacaaga, cinwaanka, iyo nambarka telfoonka.

Xadgudubku waa in uu dhacay hal sano ka hor taariikhda ashkatada la helay.

OSPI waxay samaysay warqado la buuxinayo oo aad uisticmaali karto in aad ku gudbiso ashkatada. Foomka waxaa laga heli karaa bogga internetka ee wabarashada khaaska ah ee OSPI. Lagaagama baahna isticmaalka foomkan.

Baadhitaanada Cabashada

Waa in ay baadhaa oo soo saartaa go'aan qoran 60 maalmood ka dib markay hesho cabashada, ilaa kordhinta wakhti loo damaano qaado mooyee. Inta lagu jiro 60 maalmood, OSPI (1) waxay u baahantahay in ay degmadu bixiso jawaabta cabashada; (2) oo ay ku siisaa adiga ama soo dacweeyaha fursada aad ku soo gudbinayso xog dheeraada oo ku saabsan eedaynta gudahaha askhatada (3) laga yaabaa in ay fuliso baadhitaan goobta ah oo madaxbanaan, haddii OSPI ay go'aamiso in (4) dib u eegto dhamaanxogta la xidhiidha ay samayso go'aamin madax banaan haddii ay degmada ama wakaalad kale ay ku xad gudbayso baahida la xidhiidha Qaybta B ee IDEA OSPI.

Baadhitaan, Balaadhin, Go'aan Qoran

Wakhtiga xadka 60 maalmood waa kordhin karaa keliya haddii (1) duruufo gaar ahi ay jiraan mooyee oo ku saabsan ashkato gaar ah; **ama**, (2) adiga iyo degmada dugsigaagu si aan khasab ahayn ay ku ogolaadaan ayadoo qoraal ah in la kordhiyo wakhtiga si loogu xaliyo cabashada dhex dhexaadin ama qaab kale oo lagu xaliyo khilaafaadka.

Go'aan qorani ayaa loo soo dirayaa adiga ama qofka ashkatoonaya iyo dugsiga degmada. Go'aanka qorani waxa uu ka hadli doonaa eedayn kasta. Eedayn kastana go'aanka qorani waxa uu sheegi doonaa helitaanka xaqiiqda, gebebooyinka, sababaha

go’aanka iyo talaabooyin kale oo sixitaan macquula ah oo loo arko lama huraan si loo xaliyo cabashada haddii uu dhacay xad gudub.

Bedelaadaha Cabashada

Markay OSPI hesho xad gudub ama guul daro si ay ugu bixiso adeegyada haboon hanaanka ashkatada, go’aanku waxa uu ka hadlayaa:

1. Sidda dib loogu dhex dhexaadiyo diidmada adeegayaas, sidda haboona ay ku jirto, ku abaal marinta mag-dhow lacageed ama talaabooyin kale oo sixitaana oo ku haboon baahida ardayga (dayda); **iyo**,
2. Siin mustaqbalka oo ku haboon adeegyada waxbarashada khaaska ah dhamaan ardayda.

Waxbarashada Khaaska ah Cabashada Muwaadin iyo Dacwad Cadaalada oo Sharci ah

Haddii askhatada muwaadinku la helay taas oo ah mawduuca dacwad cadaalada oo sharci ah ama cabshadu ka koobantahay arimo farabadan, oo mid ama in ka badan oo arimahaas ahi ay qayb ka yihiin dacwad cadaalada oo sharci ah, OSPI waa in ay dhinac iska dhigto (in aanay baadhin) wax qayba oo cabashda ah taas oo lagaga hadlayo dacwad cadaalada oo sharci ah uu dhamaado. Arinkastoo ku jirta cabshada oo aan qayb ka ahayn dacwad cadaalada oo sharci ah waa in lagu xaliyaa gudaha sidda ay u habaysantay askhatadu.

Haddii arin ku jirta ashkatada hore go’aan lagaga gaadhay dacwad cadaalada oo sharci ah oo qusaysa kooxo isku midda, go’aanka dhegaysigu waa waajib oo OSPI waa in ay ku war gelisaa dacweeyaha in aan laga yaabin in ay baadho arintaa.

OSPI waa in ay xalisaa askhatada ku eedaynaysa degmada in ay ku guul daraysatay in ay fuliso go’aanka waajibka sharci.

Hanaanka Dacwad Cadaalada oo Sharci ah
34 CFR §§300.507 – 300.513; WAC 392-172A-05080–05125

Guud

Adiga ama dugsiga degmada ayaa soo gubinaya codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah arin kasta oo la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta FAPE ilamahaaga. Degmadu waa in ay kugu wargelisaa wax bilaa lacag ah ama adeegyo qiimahoodu hooseeyo iyo adeegya kale oo la xidhiida goobta laga soo gudbiyay codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah ama markaad codsanayso xogta. Nimaadyada dacwad cadaalada oo sharci ah “adigu” waxaaad ku daraysaa qareenkaaga haddad mid haysato, oo “degmaduna” waxay ku daraysaa qareenka degmada haddii uu degmada wakiilanayso qareen.

Soo Gudbinaya

Codsiga dhegaysiga, adiga iyo degmada waa in loo gudbiyaa codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah ee kooxda kale. Codsigaasu waa in uu ka koobnaadaa dhamaan waxa ay ka kaboontahay ee hoos ku qoran waan in loo ilaaaliyo qarsoodi ahaan.

Adiga ama degmada, ku kastoo soo gudbiyay codsiga, waa in siddoo kale uu siiyo OSPI Adeegyada Goobaha Maamul nuqul codsiga dhegaysiga cinwaanka soo socda:

Office of Superintendent of Public Instruction
Administrative Resource Services
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504-7200
FAX: 360-753-4201

Codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah waa in ay siddoo kale ku jiraan:

1. Magaca ardayga;
2. Cinwaanka ardaygu degenyahay;
3. Magaca dugsiga ardayga;
4. Haddii uu ardaygu hoy la'aan yahay ama kuraygu, xogta lagala xidhiidhayo ardayga;
5. Faahfaahin muuqaalka dhibta, oy ku jirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibaatada; **iyo**,
6. Xilka dhibaatada ee lagu talo bixiyay ilaa heerka laga ogyahay ood adna heli karto ama degmadu wakhtiga.

Ogaysiika loo Baahanyahay ka Hor codsiga Dhegaysiga Dacwad cadaalada oo Sharci

Adiga ama degmadu lagama yaabo in ay yeelato dhegaysiga waajibaadka sharci ilaa adiga ama degmadu ay soo gudbiyaan codsiga dhegaysiga waajiaadka sharci oo ay siiso OSPI nuqul codsiga taas oo ay ku jira xogta ku qoran kor.

Ku filaanta codsiga Dacwada

Si uu hore ugu socda codiga dacwad cadaalada oo sharci ah, waa in looga fekeraa wax ku filan. *Ku filnaanto* micnaheedu waa in uu codsigu buuxiyay baahiyaha ay ka koobantahay ee kor lagu sheegay hoosta S***oo Gudbinaya***. Codsiga dhegaysiga hanaanka waajibaadka sharci waxaa looga fekerayaa mid ku filan iyadoo kooxaha helay codsiga dhegaysiga waajibaadka sharci ay ugu sheegaan ALJ iyo kooxda kale qoraal ahaan, 15 maalmood, in kooxda heshay ay rumaysantahay in codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah aanu ku filnayn.

Shan maalmood gudahood helitaanka ogaysiinta filnaansho la'aanta, ALJ waa in ay ay go'aamisaa haddii codsiga dacwad cadaalad ah oo sharci ah uu buuxiyay baahiyaha ku qoran kor, oo ay ku ogaysiisa adiga iyo degmada qoraal ahaan.

Bib U hagajinta Codsiga Dacwada

Adiga ama degmadaadu waxa ay isbedel ku samayn karaan codsiga dacwada keliya haddii:

1. Kooxda kale waxay ku ogolaatay isbedelka qoraal ahaan waxaana la siinayaa fursada lagu xalilaalyo codsiga dhagaysiga kulan xalin ah (haddii adiga, waalidku codsaday dhegaysi waajibaad sharci); **ama**
2. In aan ka dambayn shan maalmood ka hor intaanu bilaabmin dacwada cadaalada oo sharci ah, sarkaalka dacwadu waxa uu ogolaadaaya isbedelada.

Haddii adigu aad tahay kooxda codsanaysa dacwada oo aad isbedel ku samasyo codsiga dacwada cadaalada oo sharci ah sharci qaabka la isugu xigsiiyay kulanka xalinta iyo mudada xalintu (Eeg: ***Hanaanka Xalinta***) mar labaad bilow taariikhda codsiga dib loo hagaajiyay la soo gudbiyay, ama taariikhda ALJ ay bixiso codsiga.

Jawaabta degmada ee Codisga Dacwad Cadaalada oo Sharci ah

Haddii degmadu aanay kuu soo diran adiga ogaysiiska hore oo qoran, sidda lagu faah faahiyay cinwaanka hoostiisa ***Ogaysiiska Hore ee Qoran***: iyadoo qusaysa mawduuca uu ka koobanyahay codsigaaga dawcwada dacwad cadaalada oo sharci ah, degmadu waa in ay 10 maalmood gudahood helitaanka codsiga dacwada cadaalada oo sharci ah, kuu soo dirtaa jawaab ay ku jirto:

1. Sharaxaad sababata ay degmadu ugu talo bixisay ama ku diiday in ay ka qaado talaabada lagu soo qaaday codsiga dacwada cadaalada oo sharci ah;
2. Faahfaahin ikhtiyaarada kale ee kooxda IEP ee ilamahaaga looga fekeray iyo sababaha ikhtiyaaradaa loo diiday;
3. Faahfaahin habkastoo qiimayn ah, qiimayn, diiiwaan, ama warbixinta degmadu adeegsatay talaabada diidmada aha ee lagu talo bixiyay; **iyo**,
4. Faahfaahinta iyo sababaha kale ee quseeya talaabada degmada ee lagu talo bixiyaya ama la diiday.

Degmadu waxay ku cadaynaysaa in codsiga dacwada cadaalada oo sharci ah aanu kugu filnayn xataa inkastoo ay kugu siinayso xog qodabada 1-4 ee kore.

Jawaabta Kooxda Kale ee Codsiga Dacwad Cadaalada oo Sharci ah

Laga reebo dhegaysiga wajibaaka sharci ee loo dar-dar geliyay edaabta, oo lagu falanqeeyay hoos ***Hanaanka Dacwada cadaalada sharciga ah ee Edaabta*****,** kooxda heshay dacwad cadaalada sharci ah, 10 maalmood gudahood helitaanka codsiga, waa in ay u dirtaa kooxda kale jawaab taas oo si gaar ah u lafo guraysa arimaha ku jira codsiga. Mid uun kooxda weli waxay cadayn kartaa in dacwad cadaalada sharciga ahi aanu ku filnayn.

Qaabka Noocyada
34 CFR §300.509; WAC 392-172A-05085

Waxay OSPI horumarisay qaabka foomka dacwad cadaalada sharci ah si uu kaaga caawiyo gubinta codsi ah dacwad cadaalada sharci. Waxaa laga heli karaa foomka bogga internatka ee soo socda:

http://www.k12.wa.us/ProfPractices/adminresources/forms.aspx
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/DisputeResolution/DueProcess.aspx.

Lagaagama baahna in aad isticmaasho foomkan. Si kastaba ha ahaatee, xaqa aad u leedahay dacwad cadaalada sharci ah waa laguu diidi karaa ama dib baa loo dhigi karaa haddii dacwad cadaalada sharci ah aanay ku jirin dhamaan xogaha loo baahantyahay. Siddoo kale waxaad heli kartaa nuqulka foomka codsiga dacwada ka yimid waaxda waxbarashada khaaska ah ee degmadaada.

Meelaynta Ardayga Marka Dacwad Cadaalad oo Sharci la Sugayo
34 CFR §300.518; WAC 392-172A-05125

Laga reebo sidda lagugu siisyay hoosta cinwaanka ***Nidaamada Marka la Edbinayo Ardayda Naafada ah*****,** marka codsiga dacwad cadaalada sharci ah loo diro koox kale, inta lagu guda jiro mudada hanaanka xalinta oo la sugaayo go'aanka dacwad cadaalada sharci ah ee aan eexda ahayn ama dacwada maxakamada qusaysa rafcaanka go'aanka ALJda, ilmahaagu waa in uu joogaa meeshiisa ama meesheeda waxbarasho ee hadda idinkoo adiga iyo degamadu isku khilaafa mooyee.

Haddii dacwad cadaalada sharci ah uu quseeyo codsiga hore ee aqbalaada dugsiga dadwaynaha, ilmahaaga oo wata ogolaanshahaaga waa in lagu meelaayaa barnaamij dugsiga dadwayanaha caadiga ah ilaa dhamaadka dhamaan dacwadaha siddana.

Hadii codsiga dacwad cadaalada sharci ah uu quseeyo siinta adeegyada hore hoosta Qaybta B ee IDEA, ee ilmahaaga, ee ku jira xiliga kala guurka ee u adeegida hoosta Qaybta C ee IDEA ilaa Qaybta B ee IDEA, oo aan in dheeraada xaq u lahayn adeegyada Qaybta C ee isaga ama iyadu uu helaayay. Haddii ilmahaaga laga helo in uu xaq ugu leeyahay hoosta Qaybta B ee IDEA iyadoo aad ogolaansho siisay in ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegayda la xidhiidha markii ugu horaysay, welina sugaya natiijada dacwada, degmadu waa in ay bixisaa waxbarashadaa khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee aaydaan isku khilaafsanayna adiga iyo degmadu.

Haddii ALJ ay gaadho go'aan in bedelka meelayntu uu haboonyahay, go'aanka ku saabsani meelayn waain loogu dhaqmaa siddii heshiis u dhexeeya adiga iyo dugsiga degmada oo ah ujeedooyinka meelaynta inta lagu guda jiro wax rafcaan maxakmedeed ah oo go'aanada waajibaadka sharci ah.

Hanaanka Xalinta
34 CFR §300.510; WAC 392-172A-05090

Xalka Kulanka

15 maalmood gudahood ka dib markaad la soo gudbisay codsiga dacwad cadaalada sharci ah degmada iyo OSPI, degmadu waa In ay isugu yeedho kulan adiga iyo xubinta ay qusayso ama xubnaha kooxda IEP u leh aqoon gaar ah xaqiiqooyinka lagu aqoonsaday codsigaaga dacwad cadaalada sharci ah. Kulankan waa in uu dhacaa ka hor intaanu bilaaban dacwad cadaalada sharci ah, ilaa adiga iyo degmadu ay isku raacdo dhex dhexaadin mooyee ama ay isku raacdo in la dhaafo xalka dacwada. Kulanku:

1. Waan in uu ku jiraa wakiilka degmadu kaas oo leh masuuliyada go'aan gaadhid isagoo ku hadlaya magaca degmada; **iyo**,
2. Waa in aanay ku jirin qareenka degmada ilaa uu kula socdo qareen mooyee.

Ujeedada kulanku waa in aad adigu falanqayso codsigaaga dhegaysiga habka waajibaadka sharci iyo xaqiiqooyinka qaabeeya seeska codsiga. Siddaas darted degmadu waxay haysataa fursada lagu xalinayo khilaafka. Adiga iyo degmadu waxaad go'aan ka gaadhaan xubnaha la xidhiidha kooxda IEP in ay yimaadaan kulanka xalinta.

Kulanka xalintu lama huraan maaha haddii:

1. Adiga iyo degmadu aad isku waafaqdaan iyadoo qoran in aad dhaaftaan kulanka; **ama**,
2. Adiga iyo degmadu aad isku racdaan habka dhex dhexaadinta, sidda lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka ***Dhex dhexaadin.***

Mudada Xalka

Haddii degmadu aanay xalilin dacwad cadaalada sharci ah in aad ku qanacdo 30 maalmood gudahood adigoo siiyay codsiga dacwad cadaalada sharci ah degmada iyo OSPI, dacwad cadaalada sharci ah waxa laga yaabaa in uu dhaco.

45 maalmood ee isku xiga ee soo saarida go'aanka kama dambaysta ah waxa uu bilaabmayaa dhamaadka mudada xalinta ee 30 maalmood, dhowr ka reebanaan ah oo in ay ku haboonaato mudada xalinta 30 maalmood loo sameeyay, sidda hoos lagu faah faahiyay.

Adiga iyo degmada oo labadiinuba isku raacay in aad ka dhaaftaan habka xalinta mooyee ama isticmaala dhexdhexaadin, guul daradaada in aad ka qayb gasho kulanka xalinta waxay daahin doontaa mudada isku toosan ee habka xalinta iyo dacwad cadaalada sharci ah ilaa aad ku waafaqdo ka qayb galka kulanka.

Haddii degmadu aanay awood ulahayn in ay hesho ka qayb galkaaga kulanka xalinta ka dib samaynta dedaal macquul oo si faafhfaahsan u diiwaan gelisay dedaaladan, laga

yaabaa degmadu in ay, dhamaadka mudada xalinta 30 maalmood, codsato in ALJ joojiso codsigaaga dhegaysiga waajibaadka sharci. Dugsiga degmadu waa in uu si faahfaahsan u diiwaan geliyaa isku daygiisa in ay qaban qaabiyaan xalinta kulanka oo labada dhinacba isku raacsan yahiin wakhtiga iyo goobta. Diiwaanka faahfaahsan ee qoran waxa ku jira, sidda:

1. Diiwaanka faahfaahsan ee wacitaanka telefoonada la sameeyay ama la isku deyay iyo natiijooyinka wacitaanadaa;
2. Nuqulada wada xidhiidhka laguu soo diray iyo waxii jawaabaha la helay; **iyo**,
3. Faahfaahinta diiwaanka booqashada lagu yimid gurigaaga ama shaqada iyo natiijooyinka booqashada.

Haddii degmadu ay ku guul daraysato in ay qabtao kulanka xalinta 15 maalmood gudahooda adigoo siiyay degmada iyo OSPI codsiga dacwad cadaalada sharci ah, **ama** degmadu ku guul daraysato in ay ka qayb gasho kulanka xalinta, waxaad waydiin kartaa ALJ in aad dalbato wakhtiga isku xiga ee 45 maalmood ee dacwad cadaalada sharci ah uu bilaabmayo.

Ku hagaajinta 30 Maalmood ee Mudada Xalka

Haddii adiga iyo degmadu aad isku khilaaftaan in aad dhaaftaan kulanka xalinta, ka dib 45 maalmood ee isku xiga ee dacwad cadaalada sharci ah waxa uu bilaabmaa maalinta xigta.

Ka dib bilowga dhex dhexaadinta ama kulanka xalinta iyo ka hor dhamaadka muda 30 maalmood ee xalinta, haddii adiga iyo degmadu aad isku waafaqdaan qoraal ahaan in aanu suuragal ahayn wax heshiisi, ka dib 45 maalmood ee isku xiga ee dacwad cadaalada sharci ah ayaa bilaabma maalinta ku xigta.

Haddii adiga iyo degmadu isku raacdaan in aad isticmaashaan hab dhex dhexaadineed, laakiin aydaan weli heshiis gaadhin, dhamaadka mudada xalinta ee 30 maalmood, labada kooxaadba waxay isku raaci karaan qoraal ahaan in ay sii wataan dhex dhexaadinta ilaa heshiis la gaadho, Si kastaba ha ahaatee, haddii adiga ama degmadu aad ka noqotaan habka dhex dhexaadinta, ka dib 45 maalmood ee isku xiga ee dacwad cadaalada sharciga ahi waxa uu bilaabmaa maalinta xigta.

Heshiishka Dejinta oo Qoran

Haddii adiga iyo degmadu aad ku xalisaan khilaafkiina kulanka xalinta, adiga iyo degmadu waa in aad gashaan heshiis ku fulaya si sharci ah:

1. Oo uu saxeexo adiga iyo wakiilka degmada kaas oo awood u leh in uu u galo degmada heshiish sharci ah; **iyo**
2. Ka dhaqan geli kara Maxakmad kasto sare oo ku taal gobolka Washington ama meel kale oo sharciga laga fulin karo oo ku haboon ama maxkamada degmada Maraykanka.

Mudada Dib U eegida Heshiiska

Haddii adiga iyo degmadu aad heshiis gashaan ay keentay kulanka dhex dhexaadinta, mid uun adiga ama degmadu waa tirtiri kartaan heshiish 3 maalmood oo shaqo gudahood ee wakhtiga labadaba adiga iyo degmadu aad saxeexdeen heshiiska.

Codsiga Dacwada cadaalada Sharci oon Eex lahayn 34 CFR §300.511; WAC 392-172A-05080–05095

Guud

Markastoo la soo gudbiyo dacwad cadaalada sharci ah, adiga ama degmadu ku lug leh khilaafku waa in aad heshaan dhegaysi waajibaad sharci oo aan eex ahayn.

Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ)

Dacwada waxa fulin doona qof takhasus u leh oo madaxabanaan kana socda ALJ, kaas oo ay shaqaaleeyeen Xafiiska Dacwadaha Maamuleed (OAH).

Ugu yaraan, ALJ ku:

1. Waa in aanu noqon shaqaale OSPI ama degmada ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha. Si kastaba ha ahaatee, qofku ma aha shaqaale wakaalada oo keliya maxaayeelay isaga ama iyada waxaa bixiya kharashkiisa wakaalada si uu ugu adeego ALJ;
2. Waa in aanu yeelan dan shaqo ama shakhsiyeed taas oo khilaafaysa ujeedada ALJ wakhtiga dacwad;
3. Waa in uu aqoon u leeyahay oo ogsoonyahay shuruudaha warqada sharci ee IDEA, iyo shuruucda gobolka iyo federaaliga ee la xidhiidha IDEA, iyo fasiraada sharci ee IDEA ee maxkamadaha gobolka iyo federaaliga; **iyo**
4. Waa in uu aqoon iyo karti u leeyahay uu ku fuliyo dacwada, oo uu sameeyaa oo qoraa go'aamada, waafaqsan heer ku dhaqanka sharci, ku haboon.

Degma kastaa waa in ay haysataa qoraalka magacyada kuwaas oo u shaqeeya siddii ALJ, taas oo ay kujirto warbixinta takhasuska ALJ kasta. Qoraalka magacyada ALJ siddoo kale waxaa lagu hayaa Bogga internetka ee OSPI.

Xaalada Mowduuca ee Dacwad Cadaalada oo Sharci

Kooxda codsata dacwad cadaalada sharci ah ah kuma soo qaadi karo arimo dacwada hanaanka sharci ee cadaalada ay lagaga hadlin codsiga dacwad cadaalada sharci ah, iyadoo kooxaha kale ay waa faqaan mooyee.

Habka ay Isugu Xigto Codsashada Dacwad

Adiga ama degmada waa in ay soo gudbisaa codsiga dacwad cadaalada sharci ah laba sanadood gudahood taariikhda adiga iyo degmadu ogaydeen, ama ogaan lahaydeen, arimaha lagaga hadlay codsiga dhagaysiga.

Ka reebenayaalka Habka ay isugu xigto

Dhacdooyinka kor isku habaysani ma haboona haddii aanad soo gudbin codsiga dhagaysiga hanaanka cadaalada ah maxaa yeelay:

1. Degmadu si gaar ah bay khalad wakiil uga noqotay in ay xalisay dhibaatada ama arimaha aad ku soo qaadayso codsiga dacwada; **ama**
2. Degmadu waxay kuu diiday xogta adiga kaa timid taas oo loo baahna in lagu bixiyo hoosta Qaybta B ee IDEA.

Xuquuda Dhegaysiga
34 CFR §300.512; WAC 392-172A-05100

Guud

Waxaad leedahay xaq aad wakiil ugaga noqonaysa naftaada dacwad cadaalada sharci ah (oo ay ku jirto dacwad la xidhiidha nidaamyada edaabeed) adiga igo dugsiga degmadu, siddii kooxaha dacwad cadaalada sharci ah (oo ay ku jirto dacwad la xidhiidha nidaamyada edaabeed) waxaad xaq u leedihiin:

1. In uu wakiil idiinka noqdo qaryaqaan oo ay la socdaan ama la talinayaan dad aqoon khaasa ama tababar quseeya dhibaatooyinka ardayda naafada ah;
2. Soo bandhigaa cadaymo oo waajahaa, dhankasta ka eegaa, oo u baahdaa joogitaanka markhaati;
3. Mamnuucaa hordhaca cadayn kasta wakhtiga dacwadaas taas oo aan la sii shaacin shan maalmood oo shaqo ka hor dacwada;
4. Helaa mid qoran, ama ikhtiyaarkaaga, elektaroonik ah, diiwaan kelmad- kelmad dacwad ah; **iyo**
5. Helaa mid qoran, ama ikhtiyaarkaaga, helitaan xaqiiqada ah oo elektarooniya iyo go'aanada.

Xogta Shaacinta Dheeraadka ah

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dacwad cadaalada sharci ah, adiga iyo degmadu waa in ay isku shaaciyaan midba midka kale dhamaan qiimaynta la dhamasytiray taariikhda iyo talooyinka ku saabsan qiimaynta taas oo aad adiga iyo degmadu aad rabtaan in aad isticmaashaan dacwada.

ALJ waxaa ay ka mamnuuci kartaa koox kasta oo ku guul daraysata in ay u hogaansanto baahiyahan keenida qiimaynta la xidhiidha iyo talooyinka wakhtiga dacwada iyadooon ka haysan ogolaansho kooxna.

Dacwada Xuquuqda Waalidka

Waa in aad xaq u lahaataa:

1. In ilmahaagu joogo;
2. U furtaa dhegaysiga dadwaynaha; iyo,

3. Haysaa diiwaanka dacwada helitaanada xaqiiqooyinka iyo go'aanada lagugu siiyay bilaa kharash.

Habka Ay sigu Xigto Dacwad Habooni
34 CFR §300.515; WAC 392-172-05110

In aan ka dambayn 45 maalmood ka dib marka uu dhaco taariikhda 30 maalmood ee mudada kulanku **ama**, in aan ka dambayn 45 maalmood marka uu dhaco mudadii loo qabtay xalinta:

1. Go'aan kama dambaysaa lagu gaadhaa dacwada; iyo,
2. Nuqul ka mida go'aanka ayaa waraaq laguugu soo dirayaa mid kastoo ka mida kooxaha.

ALJ waxaa laga yaabaa in ay bixiso mudo kordhin gaar ah wixii ka dambeeya 45 maalmood mudada kor lagu faahfaahiyay ee codsiga kooxaha.

Dacwad kastaa waa in lagu fuliyaa wakhtiga iyo goobta macquul ahaan ku haboon adiga iyo ilmahaaga.

Go'aanka Dacwada
34 CFR § 300.513; WAC 392-172-05105

Go'aanka ALJ

Go'aanka ALJ ee ku saabsan haddii ilmahaagu helay waxbrashada dadwaynaha oo lacag la'aana oo ku haboon (FAPE) waa in ay ku salaysnaadaan sababo dhab ah.

Dacwadaha halka aad ku tuhmayso in degmadu ay samaysay xad gudub nidaamka ah, ALJ waxaa laga yaabaa in ay hesho in ilmahaagu aanu helin FAPE keliya haddii ku filnaan la'aanta nidaamka:

1. Lagu farageliyay xaq ilmahaagu uu u leeyahay FAPE;
2. Si aada loo soo fara geliyay fursadahaaga ka qayb galka hanaanka go'aan gaadhista ee ku saabsan siinta FAPE ilamaahaaga; **ama**,
3. Keentay waayitaanka nafciyaddii waxbarasho.

Qodobka Dhismaha

Xataa haddii ALJ aanay helin xad gudub FAPE, ALJ waxay weli kari kartaa in ay degmada ku amarto in ay u hogaansamaan baahiyaha ku jira qaybta hanaanka dhowrida ee shuruucda federaaliga hoosta Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 dhexda 300.536).

Codsi ka gaara Dacwad Cadaala oo Sharci

Waxaad gudbin kartaa codsiga dacwad cadaalada sharci ah arinka ka gooni ah codsiga dacwad cadaalada sharci ah hadda ka horba la soo gudbiyay.

Helitaanada iyo Go'aanka ku socda Gudida la talinta iyo Dadwaynaha

OSPI waxay tirtiraysaa wixii xog shakhsi ee la aqoonsan karo oo waxay:

1. Sii saa wixii soo baxa iyo go'aanada dacwad cadaalada sharci ah Gudida La talinta Waxbarashada khaaska ah ee Washington (SEAC); **iyo**,
2. Waxay ka dhigtaa wixii la helay iyo go'aamadaba kuwa dadwaynuhu heli karaan.

Geba gebada Go'aanka; Rafcaan
34 CFR §300.514; WAC 392-172A-05115

Go'aan lagu gaadho dacwad cadaalada sharci ah (oo ay ku jirto dacwad la xidhiidha nidaamyada edaabeed) waa kama damabays, iyadoo mid uun kooxaha (adiga ama degmada) ku lug lahaa dacwad uu rafcaan ka qaato go'aanka isagoo ku keenaya talaabo madani ah sidda hoos lagu faah faahiyay.

Dacwadaha Madaniga ah, oo lagu Darayo Mudada La soo Gudbiyay Dacwadahaas
34 CFR §300.516; WAC 392-172A-05115

Guud

Haddii labada kooxood midna aanu waafiqin waxa soo baxay iyo go'aanka dacwad cadaalada sharci ah (ay ku jirto dacwad la xidhiidha nidaamyada edaabeed), kooxdu waxay xaq u leedahay in ay dacwad madani ah keento iyadoo ay la socoto wixii ku saabsan xaalada u ahaa mowduuca dacwad cadaalada sharci ah dacwadan waxaa la keenayaa maxakamad gobol oo leh awood masuuliyadeed (maxkamad led awooda ay ku dhegaysato kiis noocan ah) ama maxkamad degmado oo Maraykanka ah. Maxkamadaha degmadu maraykanku waxay leeyihiin masuuliyada ay ku xukumaan dacwadaha lagu keeno hoosta Qaybta B ee IDEA iyadoon tixgelin inta uu khilaafku leegyahay.

Xadidida Wakhtiga

Kooxda dacwada keenaysa waxay haysataa **90** maalmood laga bilaabo taariikhda go'aanka ALJ in ay soo gudbiyaan dacwada madaniga ah

Hanaan Dheeraada

Dacwad kastoo madani, maxkamadu waxay:

1. Heshaa diiwaanka dacwadaha maamuleed;
2. Ku maqashaa cadayn dheeraada codsigaaga ama codsiga degmada; **iyo**,
3. Ku salaysaa go'aankeeda ahmiyada cadaynta oo sii saa caawimada ay maxakamadu go'aansato in ay haboontahay.

Sharciga Dhismaha

Waxna kaas oo ku jira Qaybta B ee IDEA ma xayiro ama xadido xuquuqda, hanaanka iyo daawaynta hoos timaada Distuurka Maraykanka, Xeerka Naafada ee Maraykanka ee 1990. Cinwaanka V ee Xeerka Dib u dejinta ee 1973 (Qaybta 504), ama Sharciyada kale ee Federaaliga ilaalinaya xuquuqda ardayda naafada ah, si kastaba ha ahaatee, haddii aad gudbinayso dacwad madani ah hoosta sharciyadaas oo aad raadinayso caawin hoosta Qaybta B ee IDEA, hanaanka nidaam sharci cadaaladi kor lagu faahfaahiyay wuu ku dhamaan doonaa xadka la midka ahaa ee loo baahan lahaa haddii aad ku gudbin lahay dacwada hoosta Qaybta B ee IDEA. Taas macnahedu waa weeya waxaad heli lahayd talaabooyin lagu bedeli karo hoosta sharciyada kuwaas daboolaya kuwa laga helo hoosta IDEA, laakiin guud ahaan, si aad u hesho caawin hoosta sharciyadan kale; ugu horayn waa in aad isticmaasho dacwad cadaalada sharci ah si aad u hesho wax lagu bedelo hoosta IDEA ka hor intaanad u tegin maxkamada si toos ah.

Kharashka Qaryaqaanka
34 CFR §300.517; WAC 392-172A-05120

Guud

Haddii aad ku guulaysato dacwada madaniga ah oo uu kaa wakiil yahay qaryaqaan, maxkamada oo feejignideeda leh, waxay kugu abaal marin kartaa kharashka qareenka ee macquulka ah siddii qayb kharashaadka adiga xagaaga ah.

Haddii wax talaabo ah oo dacwada hoos timid Qaybta B ee IDEA, maxkamadu, feejignaateeda waxay u siinaysaa kharsahka qareenka siddii qayb kharashka dugsiga degmada guulaysatay, ama OSPI, oo uu bixinaayo qareenkaagu: (a) soo gudbiyay ashkato ama kiis maxkamadeed oo maxkamadu ay ka heshay in uu yahay kiis cayaayira, ama bilaa aaasaas; **ama**, (b) oo uu sii dacweeyo ka dib markii dacwada loo arkay mid cayaayira, aan macquul ahayn ama bilaa aasaasa; **ama**,

Waxa talaabo ah ama dacwada oo la hoos keenay Qaybta B ee IDEA, maxkamadu iyadoo leh feejignaateeda, waxay siinaysaa kharashka qareenka oo macquula siddiii qaybta kharashka dugisga degmada oo guulaystay ama OSPI, in aad adigu bixiso ma qareenkaagu. Haddii aad codsato dacwad cadaalada sharci ah ama ka dib la keenay kiis maxakamadeed loona keenay ujeedo aan sax ahayn sidda in laga cadhaysiiyo, lagu keeno daahitaan aan lama huraan ahayn, ama loo kordhiyo si aan lama huraan ahayn kharashka dawcada.

Abaalmarinta Kharashka

Qareenka kharshkiisu waa in uu ku salasyanaadaa heerka ka jira bulshada dhexdeeda taas oo dacwada dhegaysigu ka dhacday nooca tayada adeegyada la bixinayo. Ma jiro boonooyin ama laban laabayaal la deegsan karo si loo xisaabiyo kharashka loo siiyay abaal marinta.

Kharashka qareenka looma xukumaya qiimaha la xidhiidhana lama magdhabayo wax dacwad ama dacwad oogis hoos timaada Qaybta B ee IDEA adeegyada la sameeyay ka dib soo jeedinta qoran ee xalinta:

1. Soo jeedintan waxa samaynaya gudaha wakhtiga uu amray sharciga 68 ee Hanaanka shuruucda Madaniga ah ee Federaaliga ama, xaalada dacwad cadaalada sharci ah ama dib u eegida heer gobol, wakhti kasta in ka badan 10 maalmood ka hor intaanay dacwadu bilaabmin;
2. Soo jeedinta lagu aqbalin 10 maalmood; Iyo,
3. Maxkamada ama ALJ ay hesho in caawimada kama dambaysti aad heshay aanu kaaga cuntamin soo jeedinta ama waxa la bixinayo ee xalka.

Ka sakow xaiyraadahan, maxakamadu waxay siin kartaa kharashka qareenka iyo qiimayaasha la xidhiidha adiga haddii aad guulaysato oo si wax ku oola aad ugu cudur daartay diidmada soo jeedinta xalka.

Kharshka qareenka la siinayo wax la xidhiidha kulanka kooxda IEP iyadoo ay kulanka qabtaan mooyee oo ay keentay maamulka dacwad qaadista ee maxkamada.

Xalka kulanka ayaa loo baahanyahay oo hoos imanaya dacwad cadaalada sharci ah loogama fekero kulan la isugu yeedhay iyadoo ay keentay dacwad maamuleed ama talaabo maxkamadeed, sidoo kalena loogama fekero dhagaysi maamuleed ama talaabo maxkamadeed oo ah ujeedooyijka bixinta kharashyada qareenada.

Maxkamadu way yarayn kartaa, siddii wax haboon, tiradda kharashka qareenada lagu bixiyay hoosta Qaybta B ee IDEA, haddii ay maxkamaduo gaato in:

1. Adiga, ama qareenkaagu intii lagu jiray dacwada, si aan macquul ahayn u daahiseen xalka kama dambaysta ah ee khilaafka;
2. Tirada kharashka qareenka haddii kale la ogolyahay in la siiyo si aan macquul ahayn uga badan yahay heerka saacadiiba ah ee ka jira bulshada adeegyada la midda ee ay qabtaan qareenadu macquul ahaan ay yihiin isku xirfada, sumacada, iyo khibrada;
3. Wakhtiga lagu qaatay iyo adeega sharci ee la bixiyay waxay ahaayeen xad dhaaf marka loo eego sidda ay tahay dacwadu; **ama**,
4. Qareenka wakiilka kaa ah ma siin degmada xogtii haboonayd ee ku jirtay codsiga nidaamka cadaalada sidda lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka ***Codsiga dacwad cadaalada sharci ah***.

Si kastaba ha ahaatee maxkamadu ma yaraynayso kharashka haddii maxkamadu ay hesho in gobolka ama dugsiga degmadu si aan macquul ahayn u daahiyay qaraarka

dacwada ee u dambeeya ama uu jiray xad gudub hoos imanaya Bixinta Hanaanka Dhowrida ee Qaybta B ee IDEA.

Hanaanka Edaabeed ee Ardayda Ku haboon Waxbarashada Khaaska ah

Waxa jira dhowritaan waxbarashda khaaska ah oo la siinayo ilamahaaga marka isaga ama iyada uu yahay qof wax adeeca. Dhowritaanada waxa ay yihiin ku lagu kordhinayo hanaanada edaabta quseeya dhamaan ardayda. Dhowritaanadu waxa sidoo kale ay quseeyaan dhamaan ardayda aan laga helin inay ku haboon yihiin waxbarashada khaaska ah haddii ay degmadu ogaan lahayd in ardaygu uu xaq u lahaan lahaa.

Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga
34 CFR §300.530; WAC 392-172A-05145

Go'aanka Kiis- Kiis

Shaqaalaha dugsigu waxaa laga yaabaa in ay u fekeraan duruuf u gaar ah nooceeda iyadoo ku salaysan xaalad-xaaald, marka la go'aaminayo haddii bedelka meelayntu, la sameeyay ee waafaqsan baahiya soo socda ee la xidhiidha edaabta, uu ku haboonyahay ilmahaaga kaas oo ku xad gudba xeerka dugsiga ee dhaqanka ardayga.

Guud

Ilaa xadka ay kaga qaadeen taalabada ardayda aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsiga laga yaabaa in ay, in aan ka badnayn **10 maalmood oo dugsi** isku xiga, ay ka saaraan ilamahaaga meesha uu ku jiro geeyaana meel ku haboon oo waxbarashu ku meel gaadha oo kale, meel kale, ama ay ka eryaan ilamahaaga, marka isaga ama iyadu ku xad gudbo xeerka dhaqanka ardayga. Shaqaalaha dugsigu waxa laga yaabaa in ay ku soo rogaan ka saaritaan dheeraada ilmahaaga oo aan ka badnayd **10 maalmood oo dugsi** oo isku xiga isla sanad dugsiyeedkaa shilal dhaqan xumo oo kala gaar ah; ilaa inta ka saaritaankaasi aanu ka dhignay bedelaada meelaynta (eeg ***Bedelka Meelaynta ay Sabab utahay Ka saarid Edaabeed*** Qeexida, hoos).

Marka ilamahaga laga saaray meeshiisa ama meeesheeda hadda mudo **10 maal mood oo dugsi** isla sanad dusgiyeed, degmadu waa in ay, inta lagu jiro maalmaha isku xiga ee ka saritaanka sanad dugsiyeedka, adeegyo siisaa ilaa xadka loo baahanyahay hoosta cinwaan hoosaadka ***Adeegyada***

Masuuliyad Dheeraada

Haddii dhaqanka ku xadgudbaaya xeerka dhaqanka ardayga aanu muuqaal u ahayn naafanimada ilmahaaga (eeg **Go'aanka *Muuqaalka***hoos) oo bedelka meelaynta edaabeed ay dhaafto **10 maalmood oo dugsi** oo isku xiga, shaqaalaha dugsigu waxay ku dabaqi karaan hanaanada edaabta ilmahaaga hab isku midda iyo muda isku midda sidda ay ku ahaan lahayd ardayda aan naafada ahayn, laga reebo in dugsigu uu siiyo

adeegyo ilmahaaga sidda hoos lagu faah faahiyay ***Adeegyada.*** Kooxda IEP ee ilamahaaga ayaa go'aamiya meesha kale ee waxbarashada ku meel gaadhka ah ee ee adeegyada ilamahaga xaaladan.

Adeegyada

Adeegyada la siinaayo ilamahaaga, marka isaga ama iyada laga saaray meesheedii ama meeshiisii waxa lagu siinayaa goobta waxbarasho kale oo ku meel gaadha.

Degmadu uma baahna in ay siiso ilmhaaga adeegyo haddii isaga ama iyada laga saaray meeshiisa ma ameesheeda hadda **10 maalmood ama ka yar** sanad dugsiyeedkaa, ilaa ay bixiso adeegyo ardayda aan naafada ahayn kuwaas oo si la midda looga saaray.
Haddii ilamahaaga laga saaray meeshiisa ama meesheeda hadda in **ka badan 10 maalmood oo dugsi** waa in uu ilmahaagu:

1. Sii wad helid adeegyo waxbarasho, si awood loogu siiyo ilmahaaga in uu sii wato ka qayb galka manhajka guud ee waxbarashada, in kastoo ay tahay meel kale, oo ku horumaro gaadhida ujeedooyinka ay dhigeen IEP deeda ama tiisa; **iyo**,
2. Haddii dhaqanka ilamahaagu aanay ahayn muuqaalka naafadeeda/diisa, isaga ama iyadu waa in uu helaa, si ku haboon, qiimaynta dhaqanka quseeya, iyo baritaanka hab dhaqanka, adeegyada iyo hagaajinta, kuwaas oo loogu talo galay xad gudubka dhaqanka siddaas darted mar dambe ma dhacayso.

Ka dib markii ilamaaga lagaa saaray meeshiisa meesheeda hadda **10 maalmood oo oo dugsi** isla sanad dugsiyeed, oo **haddii** ka saarida hadda ay tahay **10 maalmood oo dugsi** oo isku xigta ama ka yar, **iyo**, haddii aan la go'aamin in uu jiro bedel meelaynta ahi (ka eeg qeexitaanka hoos), **ka dib**, shaqaalaha dugsigu, iyagoo la tashanaya ugu yaraan mid ka midda macalimiinta ilmahaaga, waxay go'aan ka gaadhi doonaan ilaa inta adeegyada loo baahanyahay is ay awood ugu siiyaan ilmahaaga in ay in uu sii wato ka qayb galka manhajka waxbarashada guud, inkastoo meel kale, iyo horumarka in la gaadho ujeedooyinka lagu dejiyay IEP ilamahaaga.

Haddii ka saaridu ay tahay bedel meelaynta (eeg qeexida hoos), ilamaahgu kooxdiisa IEP ayaa go'aamisa adeegyada ku haboon si ay awood ugu siiso ilamahaaga in uu sii wato in uu ka qayb galo jadwalka gaarka ah ee waxbarashda, inkastoo meel kale, iyo si uu ugu horumaro si loo gaadho u jeedooyinka lagu dejiyay IEP giisa ama keeda.

Bedelka Meelaynta ay Sabab u tahay Ka saarid Edaabeed 34 CFR §300.536; WAC 392-172A-05155

Ka saarida ilamahaaga ee meelaynta waxbarasho ee hadda waa **Bedelid Meelayneed** haddii:

1. Ka saaridu ay ka badantahay 10 maalmood oo dugsi oo isku xigta; **ama**,

2. Ilmahaaga lagu xukumay ka saaritaano isku xig xigay kuwaas ka dhigan nooc maxaayeelay:
    a. Ka saaritaanad isku xigaa waxay wadar ahaan ka badanyihiin 10 maalmood oo dugsi gudaha sanad gugsiyeedka;
    Dhaqanka ilamahaagu waxa uu si wayn ula mid yahay dhaqankeeda ama kiisa dhacdooyinkii hore kuwaas oo keenay ka saaritaanada isku xig xiga; **iyo**,
    b. Waxaa jira asbaabo dheeraada oo laga fekeray sidda dhererka ka saarid walba, wadarta guud ee ilamahaga laga saaray, iyo isku dhawaanshaha ka saarida midba ta kale.

Waxay go'aamisay degamada dugsigu haddii noocyada ka saaritaanku ka dhiganyahay bedel meelayneed xalaalad- xaalad iyo, haddii aad ku loolanto adigu, in hoos dib loogu eego dacwad cadaalada sharci ah.

Ogaysiin

Taariikhda degmadu go'aamiso saaritaanka kaas oo ah bedelka meelaynta ilamaaga ay sababtu tahay ku xad gudubka xeerka ardayda, waa in ay kugu soo wargelisaa go'aankaa oo ay ku sii saa ogaysiiska dhowritaanka caadiga ah.

Go'aanka Muuqaalka

10 maalmood gudahood oo ah wax go'aana oo bedel meelayneed ah (eeg ***Bedelka Meelaynta sabab u tahay ka saarid edaabeed***) ee ilamahaaga maxaayeelay waxa uu ku xad gudbay xeerka dhaqanka ardayga, degmada, iyo xubnaha la xidhiidha kooxda IEP, aad go'aamiseen adiga iyo degmadu, waa in ay dib u eegaan dhamaan xogta la xidhiidha faylka ilamahaaga, oo ay ku jirto IEP diisa am teeda, ka baadhitaanu macalin ama wax xog ah oo kale oo la xidhiidha aad bixisay si go'aan looga gaadho:

1. Haddii dhaqanka la is waydiinayo uu keenay, ama uu ku lahaa xidhiidh toos ah oo muuqda, naafanimada ilamahaag; **ama**,
2. Haddii dhaqanka la iswaydiinayaa ay ahayd natiijada tooska ah ee ku guul daraysashada degmada in ay fuliso IEP ilamahaaga.

Haddii xubanaha la xidhiidha kooxda IEP ilamahaaga, ood ku jirto, ay go'aamiyaan xaaladahan in la buuxiyay, dhaqanka waa in ay go'aamiyaan in uu noqdo calaamada naafanimada ilamahaaga.

Haddii kooxda lagu faah faahiyay kor ay go'aamiso in dhaqanka la is waydiinayaa uu ahaa natiijada tooska ah ee ku guul daraysashada degmada in ay fuliso IEP, degmadu waa in ay isla markaaba qaadaa talaabo si loo bedelo la'aanta fulintaas.

Go'aanka in dhaqanku uu ahaa Muuqaalka Naafanimada Ardayga

Marka kooxda, aad ku jirto uu go'aamiyo in dhaqanku calaamad u ahaa naafanimada ilmahaaga, Kooxda IEP waa in ay mid uun:

1. Fulisaa qiimayn dhaqan oo la adeegsan karo, iyadoo degmadu fulisay qiimaynta dhaqan la adeegsan karo mooye inta aanay taasi keenin bedelka meelaynta ee dhacday, oo ay fuliso qorshaha habka go'doonka lagu suuliyo ee ilmahaaga.**ama**
2. Haddii qorshaha habka go'doonka lagu suuliyaa hore loo sameeyay, dib u eegid qorshaha go'doon suulinta, oo dib u hagaaji, ilaa inta lama huraanka ah, si aad looga hadlo dhaqanka ilmahaaga.

Laga reebo sidda hoos lagu faah faahiyay cinwaanka qaybta ***Duruufo Gaara***, degmadu waa in ay ku soo celisaa ilamahaaga meelayanta iyada ama isaga laga saaray adiga iyo degmada oo isku raaca in aad bedeshaan meelaynta mooyee oo ay qaby ka noqonaysa hagaajinta qorshaha habka go'doon ka saarida.

Duruufo gaara

Shaqaalaha dugsigu waxay u saari karaan ilamaaga meel kale oo waxbarasho oo ku meel gaadha (ay go'aansatay kooxda ardayga ee IEP)
Iyadoo oon loo eegayn haddii uu ahaa ama aanu hayn dhaqanka ilmahaagu muuqaalka naafadiisa/teeda, ilaa 45 maalmood oo dugsi, haddii iyada ma isagu:

1. U soo qaataa hub (eeg qeexida xaga hoose) dugsiga ama hub ku haystaa dugsiga, dhismaha dugsiga, ama ku shaqaynta dugsiga xeerka degmada;
2. Ula kac ahaan u haysaa ama isticmaalaa maandooriya aan sharciga ahay (eeg qeexida xaga hoose), ama iibiyaa ama raadiyaa iibka walxahaas, (eeg qeexida hoos), marka uu dugsiga joogo, dhismayaasha dugsiga, ama ku shaqaynta dugsiga xeerka degmada; **ama**,
3. Wuxuu ugaystay dhaawac halis ah (eeg qeexida hoose) qof kale markuu dugsiga joogay, dhismaha dugsiaga, ama ku shaqaynta dugsiga xeerka degmada.

Qeexitaan

- *Walax mamnuuci* waxaa loo jeedaa maan dooriyaha ama walax kale oo lagu cadeeyay hoosta qoraalada1 II, III, IV, or V gudaha qaybta 202(c) xeerka walxaha mamnuuca ah (21 U.S.C. 812(c)).

- *Maandooriye* micnaheedu waa walax mamnuuca; laakiin kuma jirto walxaha manuuca ah ee sharci ahaan loo haysto ama lagaga war hayo xirfad yaqaan caafimaadka ah oo ruqsad haysta ama ay masuuliyiin kale isticmaalayso ee hoosta xeerkaas ama hoos yimaada bixin kale oo ah sharci federaaliya.

- *Dhaawac halis ah oo jidheed* micnaheedu waa dhaawac jidh oo ku lug leh: halis muuqata oo dhimasho; xanuun xooga oo jidka ah; fool xumo dheeraatay oo muuqata; khasaare mudo dheeraaday ama dhaawaca ka gaadh siinta xubin jidhka ah, unug ama dareen.

- *Hubka* micnahiisu waa, qalab, aalad, alaab, ama walax, dhaqaaq samaynaysa ama aan samaynayn, taas oo loo adeegsado, ama si diyaara awood ugu leh, in ay dhimasho keento ama dhaawac jidhka ah oo halis ah, erey bixintan kuma jirto midida jeebka leh af ama ka yar laba iyo mid iyo hiish dhererkeedu.

Go'aanka Meesha
34 CFR § 300.531; WAC 392-172A-05150

Kooxda IEP waa in ay go'aamisaa meesha kale ee waxbarashada ku meel gaadh ka ah ee saaritaanada kuwaas oo ah **Bedelaado Meelayneed,** iyo ka saaritaanda ku jira cinwaanka ***Masuuliyad Dheeraada*** iyo ***Duruufo gaara***, xaga sare.

Hanaanka Edaabta Dacwad Cadaalada oo Sharci
34 CFR § 300.532; WAC 392-172A-05160

Waxaad soo gudbin kartaa Dacwad cadaalada oo sharci ah haddii aad khilaafto:

1. Wax go'aana oo ku saabsan meelaynta lagu sameeyay hoosta bixinta shuruucdan; **ama**,
2. Go'aanka muuqaalka kor lagu faahfaahiyay.

Degmadu waxay soo gudbin kartaa dacwad cadaalada oo sharci ah haddii ay rumaysantay in ku sii haynta meelaynta ee ilamahaaga in si wayn ay suuragal u tahay in ay dhaawac ku keento ilmahaaga ama kuwa kele.

Eeg **Dacwad cadaalada oo sharci ah** qaybta wixii xog ee dheeraada soo gudbinta codsiga Dacwad cadaalada oo sharci ah.

Masuuliyada Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ)

ALJ waa in ay fulisaa dacwad cadaalada oo sharci ah oo go'aansan. ALJ waxa laga yaabaa in ay:

1. Ku celi ilmahaaga meelaynta taas oo isaga ama iyada laga saaray haddii ALJ go'aansato in ka saaridu ay ahayd xad gudub baahiyaha lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka ***Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga***, ama in uu dhaqanka ilamahaagu ahaa muqaalkiisa ama keeda naafanimo; **ama**,
2. Dalbo bedelaad kale oo meelaynta ah ee ilamahaaga meel kale oo ku meel gaadha oo ku haboon, in aan ka badnayn 45 maalmood dugsi haddii ALJ ay go'aansato in ku sii haynta ilmahaaga meeshiisa hadda si aada ay suuragal u tahay in ay ku keento dhaawac ilmahaaga ama kuwa kele.

Dacwad cadaalada oo sharci ah waa lagu celin karaa, haddii ay degmadu aamin santahay in ku celinta ilmahaaga meelayntiisii hore ay si wayn u suuragal tahay in ay ku keento dhaawaac ilamahaaga ama kuwa kale.

Markastoo adiga ama degmadu codsato Dacwad cadaalada oo sharci ah, codsigu waa in uu buuxiyaa baahiyaha lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka ***Hanaanka Codsiga***

Dacwada Cadaalada oo Sharci ah iyo Dacwad Cadaalada oo Sharci ah laga reebo sidda soo socta:

1. Dacwad cadaalada oo sharci ah waa la dedejiyaa, waana in ay dhacdaa **20** maalmood oo dugsi gudahood ee taariikhda dhegaysiga la codsaday. ALJ waa in ay soo fulisaa **10** maalmood oo dugsi gudahood ka dib dhegaysiga.
2. Ilaa adiga iyo degmadu ay aqbasho qoraal ahaan in ay dhaafto kulanka, ama ay ku waafaqdo in ay dhex dhexaadin adeegsato, xalku kulanku waa in uu dhacaa **todoba** caana maal gudahood taariikhda aad soo gudbisay codsiga dacwad cadadaalada oo sharci ee OSPI iyo degmada. Way sii socon kartaa dacwadu ilaa arinka lugu xalilay raali ahaanshaha labada kooxoodba **15** caana maal gudahood helitaanka codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah.
3. OSPI waxa abuurtay **2** maalmood oo maalmaha shaqada ah oo isku xiga samaynta cadaynta marka adiga ama degmadu ay soo gudbiso codsiga dacwad cadaalada oo sharci ah oo la dedajiyay (ee edaabeed).

Adiga ama dugsiga degmada waxay bilaabi karaan dacwad madaniya si la midda siday ay iska horyimaadaan waxabarashada khaaska ah ee aan nidaamka ahayn dacwada cadaalada oo sharci ah (eeg ***Rafcaanka***, Xaga sare).

Meelaynta Inta Lagu Guda Jiro Dacwad Caadaalada oo Sharci 34 CFR §300.533; WAC 392-172A-05165

Marka adiga ama degmadaadu codsado dacwad cadaalada oo sharci ah oo la xidhiidha arimaha edaabta, ilaa adiga iyo degmadu isku raacaan habayn kala duwan, ilamahaagu waa in uu joogaa meel kaloo wax barasho oo sugo go'aanka dacwada, ama ilaa inta muda ka saarida uu wakhtigeedu dhacayo, lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka ***Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga***, ku kastoo ugu hor dhaca.

Ilaalinta Ardayada aan weli ku haboonayn Waxbarashada Khaaska ah iyo adeegyada La xidhiidha 34 CFR §300.534; WAC 392-172A-05170

Guud

Haddii ilmahaaga aan loo go'aamin xaq u yeelashada waxbarashada khaaska ah iyo adeega la xidhiidha, oo uu ku xad gudbo xeerka dhaqanka ardayga, waxaad xaqiijin kartaa hanaanka ilaalineed ee ilamahaaga haddii la go'aamiyo in ay degmadu ay qabtay aqoonta in ilamahaaga la qiimeeyay oo loo go'aamiyay in uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah ka hor inta dhaqanka keenay falka edaabeed aanu dhicin.

Asaaska Aqoonta Xaaladaha Edaabeed

Degmadu waxay u muuqataa in ay qabto aqoonta in ilamahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah haddii, ka hor dhaqanka keenay falka edbintu dhacay:

1. Waxaad ugu ku muujisay qoraal in ilmahaagu uu u baahanyahay waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha shaqaale horjoogayneed ama maamuleed oo dugsiga degmada ah, ama macalinka ilmahaaga;
2. Waxaad codsatay qiimayn la xidhiidha xaq u lahaanshaha waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoosta Qaybta B ee IDEA; **ama**,
3. Macalinka ilmahaaga, ama shaqaale kale oo degmada ha, waxa uu muujiyay walaacyo muuqda oo ku saabsan nooca dhaqanka uu toos ugu muujiyay ilmahaagu maamulaha waxbarashada khaaska ah ee degmada, ama shaqaale kale oo horjoogayneed oo degmada ah.

Ka reeban

Degmadu umay muuqateen in ay aqoontaa qabto haddii:

1. Aanad ogolaan qiimaynta ilmahaaga ama aanad diidin adeega waxbarashada khaaska ah; **ama**,
2. Ilmahaaga waxaa lagu qiimeeyay oo go'aan lagu gaadhay in aanu xaq u lahayn waxbarashada khaaska ah.

Xaaladaha ku haboon Haddii aanay jirin Aasaas aqooneed

Haddii ay degmadu aqoon ka haysan in ilmahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska, ka hor inta aan laga qaadin ilmahaaga talaabooyin edaabeed, si lagu faah faahiyay hoosta cinwaan hoosaadka ***Aasaaska Aqoonta XaaladahaEdaabeed*** iyo ***Ka reeban***, ilamahaaga waxaa lagu qaadi doonaa talaabooyinka edaabeed ee loo adeegsado ardayda aan naafada ahayn kuwaas oo ku kacay noocyo dhaqano la midda.

Si kastaba ha ahaatee, haddii adiga ama degmadaagu ay codsato qiimaynta ilmahaaga inta lagu jiro mudada taas oo isaga ama iyada lagu qaadayo talaabooyin edaabeed, qiimaynta waa in loo fuliyaa qaab la dedejiyay.

Ilaa qiimaynta la dhameeyo, ilamahaagu waxa uu ku jirayaa meelaynta waxbarasho oo ay go'aamiyeen masuuliyiinta dugsigu, kuwaas oo ay ku jiri karaan ka joojin ama ka eryid aan lahay adeeg waxbarasho.

Haddii ilmaha loo go'aamiyay in uu xaq u leeyahay adeegyada waxbarashada khaaska ah, iyadoo talada lagu darsanayo xogta laga helay qiimaynta ay bixisay degmadu, iyo xogta aad bixisay, degmadu waa in ay bixisaa waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga oo ay raacaan baahiyaha edaabeed ee lagu faahfaahiyay kor.

U gudbinta iyo Dacwada Masuuliyiinta Sharci Fulinta 34 CFR §300.535; WAC 392-172A-05175

Qaybta B ee IDEA kama:

1. Mamnuucdo degmada dugsiga in ay ka warbixiyaan dembi uu galay ilamahaagu kaas oo xaq u leh waxbarashada khaaska ah masuuliyiinta ku haboon; **ama**,

2. Kama hor joogsato sharci fulinta gobolka iyo masuuliyiinta maxkamadeed in ay gutaan waajibaadkooda ee qusaysa ku fulin sharciyada federaaliga iyo kuwa gobolka dembiyada uu galay ilamahaagu.

Diiwaanka Gudbinta

Haddii degmadu ay ka warbixiso dembi uu galay ilamahaagu, degmadu:

1. In ay hubisaa in nuqulada waxbarashada khaaska ah iyo diiwaanada edaabeed ay soo gudbiyaan ka fiirsasho ahaan masuuliyiinta kuwaas oo ay wakaaladu uga warbixiso dembiga; **iyo**,
2. Laga yaabaa in ay u soo dirto nuqulo ah diiwanka edaabeed iyo waxbarashada khaaska ah ee ilamahaaga keliya ilaa inta ay ogolyihiin FERPA.

Baahida Meelaynta Hal dhinac ah ee Waalidka Ardayda Dugsiyada gaarka ah ee Kharashka Dawaynaha CFR § 300.148; WAC 392-172A-04115

Haddii aad rumaysantahay in dugsigaaga degmadu aanu siin karin FAPE ilmahaaga oo aad jeceshahay in aad is ka diiwaan geliso dugsi gaar ah iyadoo aqbalin degmadu, waxaa jira talaabooyin gaar ah oo aad raacayso si aad uga codsato degmada magdhowga lacagta kaaga lumaysa dusgisga gaarka ah.

Magdhowga Meelaynta Dugsiga gaarka ah

Haddii ilamaagu hore u helay dugsiga degmada waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhdiiha, oo aad doorato in aad ka diiwaan geliso ilamaaga dugsiga gaarka ah ee barbaarinta dugsiga hoose, ama dugsiga sare adoon ogolaansho iyo gudbin ka haysan degmada, maxkamad ama ALJ waxa laga yaabaa in ay uga baahato degmada in ay kuu magdhowdo kharashka diiwaan gelintaa haddii maxkamada ama ALJ ay hesho in dugsiga degmadu aanu u diyaarin FAPE ilamahaaga si ku haboon ka hor diiwaan gelintaa in meelaynta gaarka ahi ay ku haboontahay. Maxkamada ama ALJ waxay ka heli kartaa meelayntaada mid kuhaboon, xataa haddii meelayntu aanay ku haboonayn heerka gobolka ee la xidhiidha waxbarashada ay bixiso degmadu.

Xadidida Mag dhowga

Qiimaha magdhowga sidda lagu faahfaahiyay tuduca sare waa la yarayn karaa ama la diidi karaa:

1. Haddii: (a) Kulamaadii badnaa ee IEP ee u dambeeyay ee aad ka qayb gashay ka hor intaan ilamahaaga ka saarida ilmahaaga dugsiga degmada, maad wargelin kooxda IEP in aad diidaysay meelaynta ay soo jeediyeen degmadu in ay siiyaan FAPE ilmahaaga, oy ku jirto sheegida walaacaaga iyo ujeedadaada in aad ku diiwaan geliso ilmahaaga dugsi gaar ah kharashka dadwaynaha; ama (b) ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo (oo ay ku jirto wax fasaxa oo soo dhex gala maalmaha shaqo) ka hor inta aan laga saarin ilmahaaga dugsiga dadwaynaha, maad siin ogaysiis qoraal ah degmada xogtaas;

2. Haddii, ka hor ka saarida ilmahaaga dugsiga dadwaynaha, degmadu waxa ay ku siisay ogaysiis qoran, ujeedadeeda in ay qiimeeyaan ilmahaaga (oy ku jirto warbixin ujeedada qiimaynta taas oo haboonayd oo macquul ahayd), laakiin ilamahaaga umaad soo diyaarin qiimaynta; **ama**,
3. Helitaanka maxkamada in ay dacwadahaagu ay ahaayeen kuwa aan macquul ahayn.

Si kastaba ha ahaatee, qiimaha magdhowga:

1. Waa in aan la yarayn ama la diidin si loo bixiyo ogaysiis haddii: (a) uu dugsiga kaa mamnuucay bixinta ogaysiiska; (b) aanad ka helin ogaysiis masuuliyadaada in aad bixiso ogaysiiska lagu faahfaahiyay kor; ama (c) u hogaansanaanta baahiyaha kore waxay u keeni lahaayeen dhaawac ilamhaaga; **iyo**,
2. Laga yaabaa, anshaxa maxkamada ama ALJ in aan lagu yarayn ama lagu diidin bixin la'aantaada ogaysiis loo baahnaa haddii; (a) aanad aqoon lahayn ama aanad qori karin Af ingiriisiga; ama (b) u hogaansanaan la'aantaas baahida kore ay ku keeni lahayd ilmahaaga dhaawac dareen oo halis ah ilmahaaga.

Ilaha

Haddii aad su'aalo ka hayso ku saabsan hanaanka dhowrida, fadlan la xidhiidh dugsiga degmadaada ama OSPI wixii xog dheeraada ah:

OSPI
P.O Box 47200
Olympia, Washington 98504
(360)725-6075
speced@k12.wa.us
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/default.aspx
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/Families/Assistance.aspx

Ururadan dadwaynuhu maalgeliyaan waxay ku siin karaa xog dheeraada oo ku saabsan adeegyada waxbarashada khaaska ah ee Gobolka Washington:

- Partnerships for Action Voices for Empowerment (PAVE)
  6316 So. 12th St.
  Tacoma, WA 98465
  (800) 5-PARENT (v/tty)
  Iimayl: pave@wapave.org
  Bogga Internetka: http://www.wapave.org/

- The Office of the Education Ombuds
  155 N.E. 100th St. #210
  Seattle, WA 98125
  (866) 297-2597
  Iimayl: OEOinfo@gov.wa.gov
  Bogga Internetka: http://www.governor.wa.gov/oeo/